JAMHUURIYADDA SOMALILAND

WASAARADDA DEEGAANKA IYO ISBEDDELKA CIMILADA (WDIC)

HAGAHA QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA EE QARANKA (QRDB)

©September 2022

Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Deegaanka
iyo Is-Bedelka Cimilada

Republic of Somaliland
Ministry of Environment
And Climate Change

Minister

Ref: MOE&CC/min 11/20330/2022 Date: 05/ 77 /2022

Wargalin

Ansixinta Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada

Markaan arkay: Xeerka Maaraynta Deegaanka Xr.79/2018, Qodobadiisa 10aad, 12aad, 13aad, 14aad, 18aad iyo19aad.

Markaan arkay: Dhibaatada ay mashaariicda horumarintu ku keento Deegaanka iyo Bulshada ku keento Deegaanka iyo Bulshada.

Markaan Tixgaliyay: Baahida loo qabo Hagaha Qiimaynta Raad reebka Deeganka iyo Bulshada.

Markaan la tashaday: Agasimaha Guud iyo Agaasime waaxeedyada Wasaaarada.

Sidaa daraadeed, Waxaan soo saaray maanta oo ay taariikhadu tahay **05/11/2022** Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada heer qaran kaas oo sheegaya dhamaan Mashaariicda Horumarineed in aan la fulin Karin iyada oo aan lagu samayn Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada si looga fogaado Dhibaatooyinka ay ku keenaan Mashaariicda Horumarinta Deegaanka iyo Bulshada.

Hadaba, Dhamaan Hay'adaha Dowladda iyo kuwa aan Dowliga ahayn ba waxaa la farayaa in ay ku dhaqmaan Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada ee qaranka.

Allaa Mahad Leh

Shukri H,Ismail Mohamoud(Bandare)
Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Is-Bedelka Cimillada

https://moecc.govsomaliland.org
info@moecc.govsomaliland.org
Tel: +25263 4473776

i

TUSMADA HAGAHA

GOGOLDHIG vii
Diiwaanka Ereyada La Soo Gaabiyey viii
Erey Bixin ix
SOO KOOBIDDA NUXURKA x
CUTUBKA 1AAD 1
GUUDMARKA HAGAHA QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA EE SOMALILAND 1
1.1. Hordhac 1
1.2. Ujeeddada Loo Sameeyey Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada ... 1
1.2.1. Ujeeddooyinka Gaarka Ah Ee Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada:- 2
1.3. Xayndaabka (Scope) Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada:- 3
1.4. Daneeyayaasha Bartilmaameedka U Ah Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada 3
1.5. Dulmarka Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada? 4
CUTUBKA 2aad 6
SIYAASADAHA IYO QAABDHSIMEEDKA SHARCI EE SALKA U AH QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA EE SOMALILAND 6
2.1. Hordhac 6
2.1.1. Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001) 6
2.2. Siyaasadda Qaranka Ee Deegaanka Somaliland (2015) 6
2.3. Xeerka Maareynta Deegaanka ee Somaliland, LR 79/2018 7
CUTUBKA 3aad 9
HANNAANKA QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA (QRDB) . 9
3.1. Hordhac 9
3.2. Yaa loogu talagaley QRDB? 10
3.3. Doorarka Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada: 10
3.4. Doorka QRDB ee Geeddi Socodka Go'aan Qaadashada 11
3.5. Mabaadi'da Guud Ee QRDB 12
3.6. Ujeeddooyinka QRDB 12
Ujeeddooyinka muddada gaaban: 12
Ujeeddooyinka Muddada Dheer: 12

3.7. Heerarka QRDB 12
3.8. Fulinta Hagaha QRDB 13
3.9. QRDB Oo Lagu Sidkay Qorshaynta Iyo Qaabaynta Mashruuca 14
CUTUBKA 4AAD 16
QAYBAHA IYO WEJIYADA QIIMAYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA 16
4.1. Hordhac 16
4.2. Geeddi-socodka QRDB Waxa Uu Ka Kooban Yahay Saddex Weji Oo Kala Ah; 16
Marxallada 1aad: Hawlaha Aasaasiga ah/ Hannaanka Faaqiddaada (lafagurka) 16
Marxalladda 2aad: Deraasadda Raad-reebka Deegaanka 17
4.3. Deraasadda Sahanqaadka Mashruuca 17
4.4. Deraasadda Raad-reebka 17
4.5. Aqoonsashada Habraacyada Yaraynta Raad-reebka Taban 18
4.6. Marxaladda 3aad: Dib-u-eegis iyo Go'aan-qaadasho 19
4.7. Faaqidaadda iyo Lafagurka Jidadka Isu-dhigma ee Qiimeynta Raad-reebka 20
4.8. Qiimaynta Hantidhawrka Deegaanka 21
4.9. Baadhista Deegaanka Ee Ay Samayso Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimmiladu 22
4.10. Habraacyada Yaraynta Raad-reebka Deegaanka 22
4.11. Amarrada Sixitaanka Ah 22
Tallaabooyinka Aasaasigga Ah Ee Hannaanka Deraaradda QRDB Ee Somaliland 22
CUTUBKA 5AAD 25
QAABDHISMEEDKA HAY'ADEED EE QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA 25
5.1. Hordhac 25
5.1.1. Laanta Maaraaynta QRDB 25
5.2. Cidda Mashruuca Fulinaysa 25
5.3. Hawlwadeennada Deegaanka 26
5.4. Laamaha Kale Ee Dawliga Ah 27
5.5. Dadweynaha 27
5.6. Laamaha Caalamiga Ah Ee Gargaarka 28
5.7. Xarumaha La Talinta Cilmiga Ku Dhisan 29
CUTUBKA 6aad 30

WADATASHIGA IYO KA QAYBGALKA DADWEYNA EE HANNAANKA QRDB 30
6.1. Hordhac 30
6.2. Doorka Daneeyeyaasha Ee Ka Qaybgalka Dadweynaha iyo Wadatashiga 30
6.3. Ujeeddooyinka Wadatashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha 31
6.4. Muhiimadda Ka Qaybgalka Dadweynaha 32
6.5. Ujeeddada Guud ee Ka Qaybgalka Dadweynaha iyo Wadatashiga 33
6.6. Heerarka Wadashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha 33
6.7. Aqoonsashada Daneeyayaasha Muhiimka Ah ee Hannaanka QRDB 34
6.8. Faa'iidooyinka Watashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha 36
Shaxanka 1aad: Faa'iidooyinka Uu Leeyahay Ka Qaybglka Dadweynuhu, Kooxahan Kala Duwan Ee La Soo Xulay 36
6.9. Ka Qaybgalka Dadweynha iyo Wejiyada Kala Duwan ee Hannaanka QRDB 37
Ka qaybgalka dadweynaha waxa lagu sidkaa wejiyada kala duwan ee deraasadda QRDB: 37
6.10. Goorta Ugu Habboon ee Wadatashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha 38
6.11. Caqabadaha Hortaagan Ka Qaybgalka Dadweyanaha: 39
CUTUBKA 7AAD 40
QIIMEYNTA RAAD-REEBKA BULSHO, CAAFIMAAD IYO DHAQAAALE 40
7.1. Hordhac 40
7.2. Raad-reebka Bulsho 41
7.2.1. Qaybaha Raad-reebka Bulshada 41
7.3. Raad-reebka Caafimaad 46
7.4. Raad-reebka Dhaqaale 48
Lifaaq B: Diiwaanka Dib-u-eegista Raad-reebka Deegaanka 53
Lifaaq C: Diiwaanka Faahfaahsan Ee Aqoonsiga Raad-reebka Deegaanka 56
Arrimaha Deegaanka La Xidhiidha ee Ay Saamaynta Laxaadka Lihi Soo Gaadhayso 56
Dhul ahaan 57
Khayraadka Nool 58
Tayada Biyaha Iyo Ka Faa'iideysigooda 60
Ka Faa'iideysiga Dhulka 61
Dadka, Guriyeynta Iyo Shaqo-Abuurta 62
Gaadiidka Iyo isu-Socodka 62
Tayada Hawada 63
Sawaxan/ Buuq 63

Adeegyada Dadweynaha 64
Adeegyada Aasaasiga Ah 64
Tamarta 65
Guud Ahaan 67
Dhaqanka 67
Go'aaminta Qiimeeynta Raad-reebka Deegaanka 69
Lifaaq D: Mashaariicda Guud iyo Waxqabadyada Maraya QRDB 70
Lifaaq E: Mashruuca Ka Maarmaya Hannaanka Qiimenyta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada 73
Lifaaqa F: Diiwaanka Maaraynta Dhacdada 74
Lifaaq G: Qorshaha Maaraynta Deegaanka iyo Bulshada (QMDB) 75

GOGOLDHIG

Xeerka Maaraynta Deegaanka ee Jamhuuriyadda Somaliland, Xeer Lr. 79/2018, ayaa sheegaya in Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu ay masuul ka tahay diyaarinta hagaha Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada (QRDB), looguna talagay waxqabayada la qoondeeyey ee Raad-reebka ku yeelan kara deegaanka iyo bulshada. Nuqulkani waa daabacaddii koowaad ee hagahan, waxaanay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu, ugu talagashay in uu noqdo Hagaha Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada ee rasmiga ah, lagana isticmaali doono Somaliland, sidoo kale dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel ayaa lagu samayn doonaa markii loo baahdo.

Haddaba, hagahani waxa uu noqon doonaa midka lagu maamulo hannaanka QRDB, illaa inta dib-u-eegis guud ama farsamo lagu samaynayo. Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimiladu (WDIC) waxa ay u mahadcelinaysaa Lataliyaashii ka shaqeeyay samaynta Hagaha Qiimeynta Raad-reebka iyo Deegaanka. Md. Ibraahim Maxamed Aadan - Xeeldeere Deegaan (Lataliye) oo ay caawinyeen lataliye ku-xigeen Md. Mawliid Mustafe Axmed iyo Axmed Maxamed Maxamuud Maxamed. Shaqada ay lataliyeyaashani qabteenna waxa hoggaamanisay oo isku-dubbaridaysay Wasaaradda.

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada (WDIC) ee Somaliland, waxa ay ka mahadcelinaysaa taageerada ay ku lahayd laanta Hay'dda Qaramada Midoobey ee Barnaamijyada Horumarinta, magaceedana afka Ingiirisiga loogu soo gaabiyo (UNDP), maaddaama hay'addu ay bixisay kharashaadkii lagu sameeyay hagaha QRDB. Intaas waxa dheer, xubno badan oo ka mid ah shaqaalaha wasaaradda ayaa door laxaad leh ka qaatay diyaarinta hagaha QRDB oo tabarucaad ku lahaa.

Gaar ahaan, waxa tacab badan geliyey, Md. Cabdikariin Aadan Cumar, Md. Aadan Axmed Xasan, Agaasimaha Waaxda Ilaalinta Deegaanka ee Wasaaradda; Md. Cabdinaasir A. Xirsi, Agaasimihi Guud ee Hore, WDIC; Md. Xasan Xuseen Cabdi, U-qaabilsanha UNDP ee WDIC; sidoo kale waxa si gaar ah loogu mahadnayqayaa kooxda shaqaalaha UNDP, Md. Nabiil Yousuf Cabdi (Maamule Mashruuc) iyo Cabdi Abokor Yuusuf, Madaxa Barnaamijyada, waxaana looga mahadcelinayaa dedaalkoodii iyo taageeradii ay Wasaaradda kula garab joogeen samaynta hagaha QRDB ee Somaliland.

Shukri X. Ismaaciil Baandare
Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada
Jamhuuriyadda Somaliland

Diiwaanka Ereyada La Soo Gaabiyey

WDIC: Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada

QRDB: Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada

HD: Handidhawrka Deegaanka

SQD: Siyaasadda Heer Qaran ee Deegaanka

WID: Waaxda Ilaalinta Deegaanka

JSL: Jamhuuriyadda Somaliland

XMD: Xeerka Maaraynta Deegaanka

CRD: Caddaynta Raad-reebka Deegaanka

LGC: Laamaha Gargaarka ee Caalamiga ah

QRB: Qiimeynta Raad-reebka Buslahada

Erey Bixin

Deegaan	Qaabdhismeedka dabiiciga ah ee ku xeeran aadamaha, sida biyaha, dhulka, gibilka hawada, cimilada, sawaxanka, carafta, dhaqanka, walaha nool ee xayawaanka ah, dhirta iyo bilicda.Waxa sidoo kale deegaanka ka mid noqon kara walxaha dabiiciga ah iyo kuwa aadanuhu sameeyay eebilicda u leh deegaanka.
Raad-reeb	Waa saamaynta uu ficil ku reebayo mid ama in kaban walxaha nool, bulshda, dhaqaalaha deegaanka, si taban ama si togan oo faa'iido leh.
Horumariye	Waa qof, koox ama laan isu-xilqaantay in ay hirgeliso mashruuc cusub ama sii balladhiso mashruuc hore u sii jirey, isla markaana looga baahan yahay in ay raacdo QRDB.
Qiimennta Raad-reebka Deegaanka	Waa hannaan isku-qoofalan oo baadhiseed si loo go'aansado in masshruuc la qoondeeyay uu raadreeb ba'an ku yeelanayo deegaanka iyo in kale
Laamaha/ Wakaaladaha Hormoodka ah	Wasaarad kasta, Waax kasta, Laan Kasta, Dawladaha Hoose ama Masuul Dawladeed oo uu sharci u baneeyay in u maareeyo ama wax ka ogaado qayb ka mid arrimaha deegaanka.
Habraacyada Yaraynta Raadbeebka	Waa waxqabad kasta oo lagu yaraynayo ama lagu baajinayo raadreeb laxaad leh oo mashaariicda kala duwani ay deegaanka soo gaadhsiin lahaayeen, hannaankii loo maarayn lahaa ama dib loogu sixi lagaa waxyeellada deegaanka soo gaadhi lahayd iyo dhibaatadii ka soo gaadhi lahayd shaqsiyaadka ama bulshadaba, waxaana wehiliya magdhaw iyo dib-u-dejin.
Ka qaybgal	Waa hannaanka ay daneeyayaashu uga qaybgalaan ama u saameeyaan go'aannada laga gaadhayo khayraadka sida tooska ah noloshooda u taabanaya.
Xayndaab dejinta	Waa hannaan daah furan oo lagu aqoonsanayo baaxadda Raad-reebka deegaanka soo gaadhaya, iyada oo si gaar ah diiradda loo saarayo sidii looga tegi lahaa raad-reebka aan loo baahnayn ee lagu aqoonsaday deraasadaha kale ee QRD.
Faaqidaad /rogrogid	Hannaanka loo go'aansado heerka QRDB ee loo baahan yahahay
Daneeyeyaal	Kuwa uu saamaynayo maxsuulka mashruucu ama saamaynta ku yeelan kara mashruuca la qoondeeyay, si togan ama si taban.
Cidda mashruuca fulinaysa	Shaqsiga ama ururka leh masuuliyadda guud ee mashruuca, ama shaqsiga iyo ururka ay wehiliso cidda mashruuca fulinaysa ama masuulka ka ihi.

SOO KOOBIDDA NUXURKA

Mid ka mid tiirarka uu ku taagan yahay horumarka waaraa ayaa ah garwaagsiga in deegaanka iyo horumarku aanay ahayn laba kala madaxbannaan kara, balse ay yihiin sida ul iyo diirkeed. Inta badan, midba midka kale ayuu kaabaa, mana kala maarmayaan. Sidaas awgeed, si loo gaadho horumar waara, waa in la isu-miisaamo arrimaha dhaqandhaqaale iyo ka faa'iideysiga kahyraadka deegaanka, iyada oo la dhawrayo qiyamyada deegaanka.

In kasta oo ay sii kordhayso fahamka loo leeyahay in baahi loo qabo sidii deegaanka sida ugu habboon loogu maarayn lahaa, waxa haddana si laxaad leh ula kordhaysa baahida loo qabo ka faa'iideysiga khayraadka dabiiciga ah, sida ka faa'iideysiga deegaannada iyo habnoleedyada curdinka ah oo horseedaysa dhibaatooyin deegaan oo ay ka mid yihiin xaalufinta kaymaha, carro-guurka dhikhaynta iyo arrimo kale oo deegaanka raadreeb taban ku yeelanaya, isla markaana xidhiidh la leh ficillada aadamaha. Dhibaatooyin kuwan ka sii badan ayaa ka soo ifbixi kara siyaasadaha iyo mashaariicda horumarinta oo inta badan buunbuuniya faa'iidada dhaqaale ee mashaariicda, balse intooda badan mashaariicaha horumarintu indhaha way ka laliyaan faaqidista iyo rogrogista arrimaha deegaanka iyo Raad-reebka mashruuca ee suurtagalka ah.

Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshadu (QRDB) waa hannaan isku-qoofalan oo saamaxaya in si wanaagsan loo qorsheeyo waxqabadayada iyo mashaariicda, iyada oo la dhexgelinayo ama arrimaha deegaanka khuseeya lagu sidkayo wejiga qorshaynta ee mashruuca. QRDB waxa ay daaran tahay ama ka duuleysaa aqoonsiga, saaddaalinta, iyo qiimeynta Raad-reebka muuqda ee uu mashruucu ku reebayo deegaanka, ama ha ahaado mid taban ama mid faa'iido lehba, sidoo kale waxa lagu dabbaqayaa dhammaan siyaasadaha iyo mashaariidda gaarka ah iyo kuwa dawliga ahba, si loo oddoroso ama loo maareeyo Raad-reebka taban, intii suurtagal ah, iyada oo la isku deyayo in faa'iidadana kor loo qaado.

QRDB waxa ay fursad u siinaysaa mashriicda, in la aqoonsado lana helo jidad badan oo isu dhigma, isla markaana looga wareegi karo fulinta mashruuca, iyada oo jidka lagu dooranayo sida uu isugu miisaamayo arrimaha dhaqandhaqaale iyo deegaanka, si bulshadu faa'iidada ugu badan u hesho.

Waxa soo kordhaysa tabashooyinka dadweynaha ee la xidhiidha sida ay arrimaha deegaanka Raad-reebka ugu yeelanayaan mashiicdu, sidaas awgeed QRDB waxa ay dadweynaha fursad u siinaysaa in ay qayb ka noqdaan go'aan ka gaadhista mashruuca, iyada oo loo marayo hannaanka QRDB. Waxaana hannaankan lagu hubin doonaa in dadweynuhu ra'yigooda ku darsadeen qaabaynta iyo

qorshaynta mashruuca la qoondeeyay ee laga fulinayo deegaannada ku xeeran.

Intaas waxa dheer, QRDB inta badan waxa lagu dabbaqaa mashaariicda qorshayntooda iyo qaabayntooda la soo gebagabeeyay, hase ahaatee hagahani waxa uu dhiirrigelinyaa in deraasadda QRDB la dhexgeliyo wejiga qorshaynta iyo qaabaynta mashruuca ama siyaasadda, si loo xaqiijiyo in arrimaha deegaanka khuseeya, goor hore laga sii baaran degay intii lagu jirey wejiga qorshaynta. Deraasadaha shanqaadka mashruuca ee hordhaca ah waa in QRDB ay qayb ka tahay.

Ariintani waxa ay gacan ka geysanaysaa in la gaadho go'aan bilaa turxaan ah, maxaa yeelay QRDB waxa ay cidda taladu ay ka go'do u soo bandhigtaa xogihii aasaasiga u ahaa in la fahmo arrimaha deegaanka ee ku gedaaman mashruuca ama siyaasad la qoondeeyay in ay buuxisay shuruudihii looga baahnaa, si loo fuliyo. Marnaba, QRDB looma samayn karo in lagu sababeeyo sax-ahaanshaha go'aan hore loo gaadhay.

Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada (WDIC) ayaa samaysay, mas'uuliyadina ay ka saaran tahay isku-dubbaridka, kormeeridda iyo dhawridda hannaanka QRDB ee Jamhuuriyadda Somaliland (JSL). Si kastaba ha ahaatee, fulinta hannaanka QRDB, waxa ay u taallaa wasaaradaha iyo waaxaha, suuqa gaarka loo leeyahay (suuqa ganaciga), hay'adaha aan dawliga ahayn iyo dadweynaha.

Sida ku cad hagahan, cidda maalgelinaysa ama fulinaysa mashruuc laga yaabo in uu raadreeb laxaad leh ku yeelanayo deegaanka, waxa looga baahan yahay in ay warbixin kooban oo mashruuca la xidhiidha u soo gudbiso Wasaaradda, si ay wasaaraddu ula wadaagto laanta ku habboon, loona caddeeyo heerka deraasadda QRDB ee looga baahan yahay mashruuca, talo ku habboonna loo siiyo.

Heerka QRDB ee looga baahan yahay mashaariicdu wuu kala duwan yahay, mashruucna mashruuc la mid ma aha, waaxanay ku xidhan tahay nooca mashruuca, baaxadda mashruuca, goobta mashruuca laga fulinayo, iyo Raad-reebka suurtagalka ah ee uu mashruucu yeelan karo. Kharashaadka ku baxaya deraasadda QRDB, waxa bixinaya cidda mashruuca maalgelinaysa, deraasaddana waxaa samayn doona xeeldheerayaal ay ansixisay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cilimilada ee Somaliland.

CUTUBKA 1AAD
GUUDMARKA HAGAHA QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA EE SOMALILAND

1.1. Hordhac

Nolosha dadka reer Somaliland, gaar ahaan dadka reer miyiga ahi, waxa ay si toos ah ugu tiirsan tahay khayraadka deegaanka. Dhaqaalaha xoolaha nool oo ka dhigan 60% ka mid waxsoosaarka gudaha, ayaa gebi ahaanba ku tiirsan helitaanka dhul daaqsimeed iyo hab-nololeed suuragelinaya soo saaritaanka calafka xoolaha. Haddaba, ilaalinta iyo maaraynta deegaanku waxay muhiim u tahay horumarka dalka iyo jiritaanka dadkiisa. Xeerka ugu weyn ee loo cuskado ilaalinta deegaanka iyo kor u qaadidda ka faa'iidaysiga waara, maarayntiisa, ilaalinta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ba, waa Xeerka Maareynta Deegaanka, Xeer Lr. 79/2018.

Dastuurku (2001) waxa uu dhigayaa, soona jeedinayaa ilaalinta deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah. Xeerarka kale ee khuseeya arrimaha deegaanka waxa ka mid ah: Xeerka Macdanta 2018; Xeerka Biyaha Qaranka 2010; iyo Xeerka Maareynta Qashinka iyo Fayadhawrka Magaalooyinka Somaliland ee Xeer Lr. 81/2018. Si kastaba ha ahaatee, Xeerka Maareynta Deegaanka ee Xeer Lr. 79/2018 ayaa bud-dhig iyo gundhig sharci u ah fulinta qiimaynta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada oo qayb ka ah siyaasadda deegaanka.

Waxaa jira waax ka mid ah Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimmilada(WDIC) oo u xilsaaran Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada, oo hubisa la socodka u hoggaansanaanta habraacyada ilaalinta deegaanka, iyada oo la xoojinayo shaqada Waaxda Ilaalinta Deegaanka ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada.

1.2. Ujeeddada Loo Sameeyey Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada

Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshadu (QRDB), waa habraac loogu talagalay hirgelinta qorshayn wax-ku-ool ah, waxa uu innoo oggolaanayaa in aynu arrimaha deegaanka khuseeya ku darno qorshaynta mashruuca marka ugu horreysa ee lagu guda-jiro wejiga qorshaynta iyo qaabaynta. QRDB waxa uu daarantahay aqoonsiga, saadaalinta iyo qiimaynta Raad-reebka deegaanka ee la oddorosi karo, faa'iidooyinka iyo Raad-reebka taban ee siyaasadaha horumarinta guud, kuwa gaarka ah iyo mashaariicda, iyada oo loo gol-leeyahay sidii meesha looga saari lahaa ama loo yarayn lahaa Raad-reebka taban, intii suurtagal ah, korna loogu qaadi lahaa Raad-reebka togan.

Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshadu(QRDB) waa hannaan qorsheyneed iyo go'aan qaadasho labadaba. Qorshayn ahaan, hagaha QRDB waxa uu soo bandhigayaa hababka iyo

farsamooyinka lagu aqoonsanayo, lagu oddorosayo, laguna qiimeynayo Raad-reebka deegaanka ee mashaariicda, waxaana diiradda lagu saarayaa wareegga mashruuca oo dhan (qorshaynta, fulinta iyo wejiga soo afmeeridda). Haddaba, hagaha QRDB wuxa uu u soo bandhigayaa cidda ay taladu ka go'do macluumaadka lagama maarmaanka u ah si go'aan looga gaadho mashruuc la fulinayo.

Sida ku cad Dastuurka Somaliland 2001, iyo xeerarka ka farcama ee u ka mid yahay Xeerka Maareynta Deegaanka Somaliland (Xeer Lr 79/2018), waxay dhigayaan sida ku cad mabaadii'da aasaasiga ah ee QRDB waxaana ka mid ah in qof kastaa uu xaq u leeyahay in uu helo deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba iyo in qof kasta uu waajib ka saaran yahay in uu xoojiyo ilaalinta deegaanka. Sidaas darteed, Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada oo ah mid ka mid ah habraacyada maaraynta deegaanku waxa ay sii ambaqaadaysaa oo ay fududaynaysaa, isla markaana ay mabaadii'dan ku daraysaa sidii loo gaadhi lahaa horumar waara oo joogtaysan. Mabaadii'da aasaasiga ah ee QRDB waxa ka mid ah in qof kastaa uu xaq u leeyahay deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba iyo in qof walba uu mas'uul ka yahay hagaajinta iyo ilaalinta deegaanka. Sidoo kale, hagaha qiimaynta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada ayaa fududaynaya in la sii xoojiyo mabaadii'da aasaasiga ah ee horumarka waara, si waafaqsan Xeerka Maareynta Deegaanka Somaliland (Xeer Lr. 79/2018) iyo Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ee 2001.

1.2.1. Ujeeddooyinka Gaarka Ah Ee Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada:-

Ujeedooyinka waxa ka mid ah:

1. Xaqiijinta, hirgelinta iyo u hoggaansanaanta qiimeynta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada, shari ahaan iyo farsamo ahaanba.
2. Samaynta iskaashi iyo wadashaqayn dhaw oo dhex marta daneeyayaasha muhiimka ah ee Maareynta Deegaanka
3. Yagleelidda hab-dhaqan wanaagsan oo joogto ah oo ku aaddan maaraynta iyo ilaalinta deegaanka Jamhuuriyada Somaliland.
4. Caawinta hawalwadeeennada iyo la-taliyayaasha, si ay u fuliyaan hawlahooda la xidhiidha qiimaynta deegaanka.
5. Kaalmaynta dhinacyada danaynaya iyo kuwa ay khusayso, gaar ahaan bulshooyinka ku hawallan xaqiijinta xuquuqaha iyo doorarkooda deegaanka.
6. Caawinta ilaalinta deegaanka iyo u oggolaanshaha xubnahu in ay gutaan doorkooda iyo

waajibaadkooda la xidhiidha deegaanka.

1.3. Xayndaabka (Scope) Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada:-

• Sugidda habraacyada iyo hirgelinta Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada, si loo fududeeyo habka go'aan qaadashada ee heer wasaaradeed ee bixinta nidaamka shahaado-siinta QRDB.

• Qeexida tallaabooyinka habraacyada daraasadaha QRDB iyo qaabka loo dhigayo warbixinnaha daraasadaha QRDB ee loo soo gudbinayo Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada (WDIC), Waaxda Ilaalinta Deegaanka. Sidoo kale, habka dib u eegista daraasadaha QRDB iyo go'aan gaadhista ayaa lagu sharraxay.

• Soo gudbinta macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan Raad-reebka deegaanka ku iman kara, hab-raacyada iyo tallaabooyinka lagu yaraynayo, iyada oo tusaale loo soo qaadanayo wadaagayaasha dhanka horumarka, waxaana loo meeleeyay diiwaan ay ku teedsan yihiin qodobbada lagu qiimaynayo Raad-reebka mashruucu. Sidoo kale, waxa muunad ahaan ula socda habraaca lagu yaraynayo Raad-reebka deegaanka.

1.4. Daneeyayaasha Bartilmaameedka U Ah Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada

Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada waxa loogu talagaley bulshaweynta, daneeyayaasha mashruuca, cilmi-baadhayaasha, laamaha qorsheynta, hawl-wadeennada QRDB, la-hawlgalayaasha horumarinta, goobaha waxbarashada, shaqaalaha wakaaladaha hormoodka ah, Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, gaar ahaan in Shaqaalaha Waaxda Ilaalinta Deegaanka, in ay fahmaan oo raacaan nidaamka QRDB iyo sidoo kale in ay ogaadaan sida go’aan loo gaadhi karo iyada oo la adeegsanayo QRDB.

Waxaa la rejeynayaa in tani ay fududeyso hannankii la isu waafajin lahaa arrimaha deegaanka, mashaariicda horumarinta, siyaasasadaha iyo qorshayaasha kale.

Marka gudaha Somaliland laga hirgelinayo QRDB, xayndaabka QRDB wuu baaxadweyn yahay waxaana diiradda lagu saari doonaa dhinacyada bulsho, caafimaad iyo dhaqaale ee deegaanka. Sidaaas awgeed, hagahani waxa uu soo bandhigi doonaa in QRDB uu xambaarsan yahay qaybo lagu dersayo Raad-reebka bulshada iyo caafimaadka, kuwaas oo aan inta badan loo aqoonsanayn in ay qayb ka yihiin qiimaynaha deegaanka.

1.5. Dulmarka Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada?

Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshadu waa hage xambaarsan habraacyo iyo tilmaamo lagu fulinayo Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada ee mashaariicda ay suurtagalka tahay in ay raadreeb laxaad leh ku reebaan deegaanka.

Hagahan, waxa loogu talagalay in ay isticmaalaan kooxo kala duwan oo ay ka mid yihiin dadweynaha, laamaha horumarinta, hawlwadeennada QRDB, shaqaalaha wakaaladaha hormoodka ah ee qaybta ka ah dib-u-eegista qiimeynta Raad-reebka deegaanka, iyo Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, gaar ahaan Waaxda Ilaalinta Deegaanka oo leh mas'uuliyadda guud iyo kormeerka fulinta xeerarka lagu ilaalinayo laguna dhaqangelinayo Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada, iyada oo lagu dabbaqayo dhammaan mashaariicda sRaad-reebka ku yeelan kara deegaanka ee laga fulinayo gudaha Somaliland. Hagani waxa uu soo jeedinayaa mas'uulidda guud ee isku-dubbaridka, dib-u-eegista iyo ansixinta Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada. Si la mid ah sidaas, hagan waxa loo sameeyay si loo helo hab nidaamsan iyo jid loo maro samaynta Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka ee Somaliland, oo daboolaysa baahiyaha kooxaha kala duwan ee adeegsanaya. Waxa hagan dib u eegis lagu samayn doonaa oo wax laga beddeli doonaa hadba sidii loogu baahdo iyo goorta ku habboon.

Si kastaba ha ahaatee, si loo dabbaqo ujeeddooyinka hagahan, waxa nuqulkan loo habeeyay loona kala dhigay Toddoba Cutub, oo kala ah sidan soo socota:

1. Cutubka Kowaad oo si kooban u faahfaahinaya macnayaasha iyo adeegsiga hagaha qiimaynta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada ee Somaliland, waxa kale oo uu hoosta ka xarriiqayaa muhiimadda QRDB oo ah habraac qorshayneed iyo kaalmayn go'aan qaadasho oo deegaanka ku habboon.
2. Cutubka Labaad ee hagaha QRDB, waxa uu hoosta ka xarriiqayaa siyaasadaha iyo shuruucda lagu hagayo qiimeynta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada ee Somaliland. Waxa sidoo kale, qaybtan ku xusan mabaadi'ida guud iyo habraacyada loo marayo QRDB.
3. Cutubka Saddexaad ee hagaha QRDB, waxa uu sharraxguud ka bixinyaa habraacyada deraasadaha DQRB ee Somaliland iyo wejiyadooda kala geddisan. Sida, aqoonsashada, saadalinta, iyo yaraynta raadreedka daran.
4. Cutubka Afraad ee haguhu waxa uu tilmaaya doorka hay'daha kala duwan ee qaybta ka ah hannaanka qiimeynrta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada ee Somaliland. Laamaha ama

hay'adaha cutubku uu doorarkooda timaamayaa waxa ay isugu jiraan kuwo dawli ah oo ku xusan Xeerka Maarynta Deegaanka- Xeer Lr. 79/2018; iyo laamo aan dawli ahayn oo ay ka mid yihiin Ururrada Bulshada iyo Hay'adaha Caalamiga ahi.

5. Cutubka Shanaad, waxa uu faaqidayaa oo uu faahfaahinayaa sida mashaariicda horumarinta loogu adeegsanayo deraasadaha QRDB iyo sida loo fulinayo deraasadda qiimeynta Raad-reebka deegaanka iyo bulshada. Waxa kale oo uu soo jeedinayaa hannaanka iyo nidaamka ay laamaha awoodda u lihi ula soconayaan fulinta deraasadaha QRDB iyo meeqaamka ama baaxadda deraasadaha looga baahan yahay mashaariicda kala duwan.
6. Cutubka Lixaad ee hagaha QRDB waxa uu dhidibbada u taagayaa oo qeexayaa hannaanka wadatashiga ku dhisan ee QRDB iyo ka qaybgalka dadweynaha. Sidoo kale, waxa uu faahfaahina sida loo suurtagelinayo ka qaybgal dadweynaha iyo daneeyayaasha kala duwan.
7. Cutubka Toddobaad ee hagaha Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Buslhadu waxa uu isku tolayaa deraasadaha Raad-reebka bulshada, caafimaadka, dhaqaalaha iyo deegaanka iyo hannaanka loo sameeyo.

CUTUBKA 2aad

SIYAASADAHA IYO QAABDHSIMEEDKA SHARCI EE SALKA U AH QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA EE SOMALILAND

2.1. Hordhac

2.1.1. Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland (2001)

Dasruutka Jamhuuriyadda Soomaliland oo ah qaabdhismeedka sharci ee ee muhiimka ah u ah xeerarka maaraynta Arimaha Deegaanka ee Dalka.

Qodobka 18-aad ee dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland- 2001, wuxuu diiradda saarayaa deegaanka iyo daryeelka khayraadka dabiiciga ah, taas oo muhiim u ah bedqabka guud ee bulshada. Sidaas darteed, waxa soo raacaya in mashaariicda horumarineed ay waafaqaan qodobkan dastuuriga ah ee ku waajibinaya dhammaan laamaha horumarintu in ay xil iska saaraan, joogtaynta, helitaanka iyo ilaalinta deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba.

Si doo kale, qodobka 12aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland -2001, waxa uu diiradda saarayaa hantida guud, khayraadka dabiiciga ah iyo wax soo saarka waddaniga ah. Qodobku waxa uu dhigayaa in dawladda dhexe ay mas'uul ka tahay khayraadka dabiiciga ah ee dalka, isla markaana ay qaadayso tallaabo kasta oo suurtagal ah si loo baadho loogana faa'iidaysto dhammaan kheyraadka ku jira berriga ama badda qaranka. Ilaalinta iyo habka ugu wanaagsan ee looga faa'iidaysan karo kheyraadkan dabiiciga ah waxaa qeexaya xeer.

2.2. Siyaasadda Qaranka Ee Deegaanka Somaliland (2015)

Siyaasaddan oo ay Wasaaradda Deegaanka iyo Isbedelka Cimilada Somaliland soo saartay 2015-kii, waxa ay diiradda saaraysaa xidhiidhka ka dhexeeya dhimista saboolnimada, ka haqab-beelka cuntada iyo ujeeddooyinka horumarinta qaranka. Siyaasaddu waxay xoogga saaraysaa baahida loo qabo in la sameeyo rejooyin cusub oo lagu horumarinayo heerarka kala duwan ee nolosha, taas oo u sahlaysa bulshada inay isku filnaadaan oo ay gartaan awooddooda, iyaga oo aan waxyeello u geysan deegaanka.

Sidoo kale, waxa ay jaangoynaysaa qaab-dhismeedka maamulka waara ee deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah. Siyaasaddu waxa ay isku-deyaysaa hubinta in hantida iyo khayraadka dabiiciga ah ee dhulku ay ilaashanto si ay u daboosho baahiyaha jiilalka hadda jira iyo kuwa mustaqbalka.

Si la mid ah sidaas, siyaasaddu waxa ay isku deyaysaa in ay dardargeliso hirgelinta qorsheyaasha horumarinta deegaanka, bulshada iyo dhaqaalaha oo waara, si hab siman looga wada faa'iido.

Siyaasaddu waxay u ololaynaysaa ka qaybgalka bulshada, faafinta macluumaadka, barashada deegaanka, wacyigelinta iyo sinnaanta aan ku dhisnayn jnisiga, si si buuxda looga faa'iidaysto "awoodda dahsoon".

QRDB waxa ay muhiim u tahay in la hubiyo in mashaariicda ay fulinayaan laamaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ba ay yihiin kuwo aan deegaanka dhibaato ku keenaynin. Waxaanay qiimayntani ka soo bilaabmaysaa qorshaynta mashruuca, fulintiisa illaa dhammaystirkiisa. Marka loo eego mabaadi'da Siyaadda Qaranka ee Deegaanka (2015), waxa waajib ah in dhammaan balliyada iyo biyaqabatinnada kale ee la dhisayaa ay noqdaan kuwo waafaqasan QRDB, waana in loo qaabeeyo si aanay ka dhalanaynin raadreeb taban oo deegaanka soo gaadhaa.

Sidaas awgeed, siyaasaddu, iyada oo la adeegsanayo QRDB waxa ay isku dayaysaa in dhammaan mashaariicda horumarinta, siyaasadaha, qorshayaasha iyo waxqabadyada kale ee la halmaala ay dhexgeliso arrimaha deegaanka mudnaanta u leh, laga soo bilaabo heer qaran, heer degmo illaa heer deegaan, waana in la dhiirrigeliyo ka qaybqaadashada bulshada.

2.3. Xeerka Maareynta Deegaanka ee Somaliland, LR 79/2018

Xeerkani waa xeer Baarlamaan kaas oo sheegaya aasaasida hannaan sharci iyo hay'ado ku habboon maamulka deegaanka iyo arrimaha la hal maala. Xeerka Maaraynta Deegaanka, Xeer Lr. 79/2018, waxa uu qof walba siinayaa xaquuqda iyo xaq u lahaanshaha deegaan nadiif ah oo caafimaad qaba, tani waxa ay sare u qaadaysaa arrimaha deegaanka illaa heer dastuuri ah. Arrintani waxa ay gacan siinaysaa deegaanka, waxaanay gacan ka geysanaysaa horumarinta heerka wacyiga dadweynaha ee ku la xidhiidha muhiimadda deegaanka.

Qof kasta oo reer Somaliland ah waxa ku waajib ah in uu ilaaliyo deegaanka si waafaqasan xeerkan.

Hagaha Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada (QRDB), waa habraac loogu talagalay qorshaynta wax-ku-oolka ah, ayaa lagu dabbaqayaa si loo sameeyo oddorosidda suurtagalka ah ee Raad-reebka deegaanka ee mashaariicda la qoondeeyay. Waxa sidoo kale, lagu hubinayaa u hoggaansanaanta iyo waafaqasanaanta ay mashaariicdu waafaqsanyihiin siyaasadaha deegaanka iyo xeerarka kale ee deegaanka. Si looga gaashaanto, loona yareeyo khataraha la oddorosi karo, intii suurtagal ah. sida ku cad qorshaha maaraynta deegaanka, waxaa si joogto ah macluumaad loo siinayaa kormeerka, si loo hubiyo heerarka maaraynta deegaanka bilow illaa dhammaystir, iyada oo loo marayo hababka ugu wanaagsan.

Qaybta 25 aad ee Xeerka Maaraynta Deegaanka, LR. 79/2018, waxa ay dhigaysaa sidan soo socota "Daraasadda QRDB waa in la sameeyaa marxaladaha hore ee mashruuciicda horumarinta". Waa habraac go'aan qaadasho oo jaangooya in mashruuc la fuliyo, la hakiyo ama wax laga beddelo ka hor intaan la hirgelin.

Cidda mashruuca qoondaysay ama maalgelinaysaa ma fulin doonto mashruuc ay u badan tahay in uu yeesho raadreeb deegaan oo taban, kaas oo QRDB uga baahanyahay Xeerka Maaraynta Deegaanka, Lr. 79/2018 ama xeer nidaamiye la helo lama fulin karo sida waafaqsan xeerka.

ma jiro sharci cidna u oggolanaaya in ay ka ganacsato, dhoofiso ama soo dejiso mashruuc raadreeb taban ku keenaya deegaanka ilaa ay ansixiso wasaarada deegaanka iyo isbedelka cimiladu.

CUTUBKA 3aad

HANNAANKA QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA (QRDB)

3.1. Hordhac

Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshadu (QRDB), sida lagu qeexay Xeerka Maaraynta Deegaanka Qaranka ee Xeer Lr. 79/2018, waa "baadhis nidaamsan oo la sameeyo si loo ogaado o in mashruucu raadreeb laxaad leh ku yeelan doono deegaanka iyo in kale".

QRDB waa hab lagu falanqeeyo Raad-reebka togan iyo midka taban ee mashruuca, qorshaha, ama waxqabadyada la qoondeeyey ee raad ku reebi kara deegaanka. QRDB waxaa ku jiri kara deraasado ku saabsan cimilada, dhirta iyo xawayaanka, ciidda, caafimaadka aadanaha oo ay ku jiraan saameynta jidheed, bulsho, dhaqaale iyo dhaqan. Waa mid ka mid ah ujeeddooyinka la isula qaatay si loo hubiyo gaadhista horumarka waara.

Si kastaba ha ahaatee, QRDB waa in la sameeyaa ka hor inta aan mashruuca la bilaabin. Marka la derso Raad-reebka suurtogalka ah ee uu mashruucu ku yeelan karo deegaanka, waxa suurtogal ah in meesha laga saaro ama laga fogaado waxyeellada deegaanka soo gaadhaysa iyo kharashaadka kale ee la geli lahaa marka mashruca dib u qaabaynta ama dib u fulinta lagu samaynayo, iyada oo ay ujeeddadu tahay in Raad-reebka taban la yareeyo ama meesha laga saaro.

Haddaba, deraasadda QRDB waa in ay ahaato mid faahfaahsan oo dhammaystiran, waxaana in tixgalin gaar ah in la siiyo mudan sidii loo heli lahaa jidad isu-dhigma oo la isku beddelan karo, waana in lagu daro kala doorashooyinkaas door saamaxaya in aan wax ficil ah la samaynin, markii loo baahdo.

Si kastaba ha haatee, guud ahaan QRDB waxaa loo adeegsadaa in oo fuliyaa waxyaabahan soo socda:

- Aqoonsashada lagu aqoonsanayo in mashruuc ama siyaasad la qoondeeyay ay raadreeb laxaad leh ku yeelan karto deegaanka iyo in kale (mid taban ama mid togan).
- Haddii ay haa tahay oo uu jiro raardreeb deegaan, in la caddeeyo nooca raadreeb ee deegaanka ku iman kara:
- Faaqidaada iyo lafagurka Raad-reebka taban ee deegaanka;
- Go'aaminta in Raad-reebka taban in la yarayn karo iyo in kale;
- In la soo jeediyo tallaabooyinka ka hortagga ama tallaabooyinka kale oo lagu yaraynayo Raad-reebka taban;

- In la aqoonsado, lana qiimeyso siyaasadaha kale ama mashaariicda looga guuri karo mashruuca ama waxqabadka la qoondeeyay iyo hawalaha kale ee xidhiidhka la leh;
- Soojeedinta in mashruuc ama siyaasad hore loo qorsheeyay, wax ka beddel lagu sameeyo ama la fuliyo.

3.2. Yaa loogu talagaley QRDB?

- Laamaha horumarinta/Kaalmeeyayaasha mashaariicda
- Wakaaladala ansixinta mashaariicda/ wakaaladaha hormuudka ah
- Laamaha Dawladda/Dadweynaha
- Suuqa gaarka loo leeyahay/Ganacsatada/ Maalgeliyayaasha

Intaas waxa dheer, marka loo qorayo dadweynaha QRDB, waa in ay ahaato mid fudud oo kooban oo uu fahmi karo qof waliba, haddii kale lama gaadhayo ujeeddadii loo sameeyay. Ujeeddada gu weyni waa in lagu wargeliyo cidda mashruuca loo fulinayo, cawaaqibka uu mashruucu ku keenayo deegaanka, iyo Raad-reebka kale ee uu ka tegi karo.

Marka QRDB loogu talagalay in cid lagu wargeliyo, waa in lagu qoro qoraal fudud oo kooban, oo u dhigan qaab dhammaystiran. Haddii loogu talagalay laamaha horumarinta, waa in loo qaabeeyaa si cilmiyaysan iyada oo la adeegsanayo erey bixinta cilmiga ku dhisan ee u baahan in la dheefshiido. QRDB, waa in ay ka kooban tahay macluumaad awood u siinaya cidda ay talada mashruucu ka go’do, in ay gaadhaan go'aan xog-ogaalnimo iyo xaqiiqo ku dhisan.

3.3. Doorarka Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada:

i. QRDB, waxay awood u siinaysaa laamaha horumarinta iyo cidda ay talada mashruucu ka go’do in ay saadaaliyaan oo ay qiimeeyaan Raad-reebka suurtagalka ah ee mashruuca iyo dhug u yeelashada fayo-qabka deegaanka. Sidoo kale, waxay ka caawisaa inay aqoonsadaan jidad isu dhigma, iyada soo jeedinaysa jidka kale ee ku habboon dhaqaale ahaan, busho ahaan iyo deegaan ahaanba.

ii. Doorka aasaasiga ah ee QRDB waa inay u faa’iideyso laamaha horumarinta iyo wasaaradaha sida WDIC iyo Laamaha Qorshaynta Magaalooyinka, fursad ay ku doortaan mashruucyo ay aqoon buuxda u leeyiin Raad-reebka ay ku leeyihiin deegaanka. Waxa kale oo ay awood u siinaysaa masuuliyiinta ay khusayso in ay go'aan ka gaadhaan in loo oggolaado mashruuca, in uu socdo iyo in kale. Tani waxa ay laamaha horumarinta iyo qorsheeyayaasha u madhxinaysaa dhaqaale iyo wakhti badan oo khasaari lahaa, waxaanay

tusaysaa sidii loo samaysan lahaa siyaasad iyo qorshayaal aan deegaanka dhibaato ku haynin.

iii. QRDB waxay gacan ka geysan kartaa kor u qaadista sumcadda shirkadda ama laanta, waxayna sidoo kale sawir wanaagsan oo xilkasnimo muujin ah ka gudbinysaa shirkadaha, hay'adaha iyo laamaha dawladda ee mashruuca fulinaya.

iv. Hagaha QRDB ayaa sidoo kale faa'iido weyn u leh bangiyada iyo hay'adaha kale ee maaliyadeed ee maalgelinta u fidiya macaamiishooda. Waa hab ay hay'addu ku ilaalin karto maal-gelinteeda iyada oo hubinaysa in mashruucu buuxiyo dhammaan shuruudaha qorshaynta iyo sharciga, gaar ahaan arrimaha khuseeya deegaanka.

v. QRDB waa habraac loo qaabeeyay in lagu yareeyo Raad-reebka deegaanka ee mashruuca, iyada oo laga eegayo mashruuca, la isuna miisaamayo khasaarihiisa iyo faa'iidooyinkiisa la xidhiidha deegaanka.

vi. QRDB waxay u fiican tahay qorshayayaasha maaddaama ay awood u siiso cidda mashruuca fulinaysaa inay gaadho go'aan deegaan iyo dhaqaale ahaanba habboon inta lagu jiro qorshaynta mashruuca. Sidoo kale, waxay awood u s siinaysaa inay sii wadaan ama joojiyaan mashaariicda noocaas ah ee laga yaabo inay raadreeb taban ama togan ku yeeshaan deegaanka.

vii. QRDB, waa shuruud sharci ahaan loogaga baahan yahay mashruuc kasta oo ay u badan tahay inuu raadreeb xun ku yeesho deegaanka si loo fuliyo. Markaa maalgeliye/mashruuc fuliye kasta oo lagu helo inuu sharciga ka hor imanayo waxa laga qaadi doonaa tallaabo sharci ah.

3.4. Doorka QRDB ee Geeddi Socodka Go'aan Qaadashada

Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo bulshadu waxay udub-dhexaad u tahay habka go'aan qaadashada. Waa in la fuliyaa si loo hubiyo in khayraadka deegaanka ee muhiimka ah la sugo, lana ilaaliyo xilli bilowga qorshaynta iyo go'aan qaadashada. QRDB waxa ay kaalin weyn ka qaadataa habka go’aanqadashada habboon. Intaas waxa dheer, QRDB waxa ay u soo bandhigaysaa cidda ay talada mashruucu ka go’do, macluumaadka lagama maarmaanka u ah si loo go'aamiyo in mashruuca ama siyaasadda la qoondeeyay ay waafaqsan tahay shuruudaha loogaa baahan yahay mashaariicda iyo in kale. Sidoo kale, QRDB waxa ay siisaa cidda talada mashruucu ay ka go’do fursad ay ku ogaato Raad-reebka fog ee u mashruucu deegaanka ku yeelan karo, ka hor inta aan go'aan laga gaadhin in la ansixiyo lana hirgeliyo mashruuca la qoondeeyay.

3.5. Mabaadi’da Guud Ee QRDB

- Arrimaha deegaanka waa in lagu xisaabtamaa marka la fulinayo dhammaan waxqabadyada horumarinta
- Ka-qaybgalka dadweynahu waa u muhiim dhammaan mashaariicda
- Garwaaqsiga mabaadi'da iyo dhaqanka soo jireenka ah ee bulshadu ay u adeegsan jirtey maareynta deegaanka iyo kheyraadka dabiiciga ah
- In tixgelin la siiyo iskaashiga caalamiga ah iyo si hufan uu maamulidda kheyraadka la wadaago
- Sinaan guud oo aan jiilna laga tegaynin
- Mabda’a lacagaha ku waajibey wasakheeyaha
- Mabda'a taxaddarka

3.6. Ujeeddooyinka QRDB

Ujeeddada guud ee QRDB waa in la hubiyo in arrimaha deegaanka oo lagu daro dhammaan hawlaha horumarinta si loogu guuleysto horumar waara.

Ujeeddooyinka muddada gaaban:

- Horumarinta qaabaynta qorshayaasha, iyada oo la waafajinayo deegaanka,
- Garwaaqsiga Raad-reebka mashruucu uu ku yeelanayo deegaanka
- In la hubiyo isticaamaalka khayraadka iyo qalabka si loo ogaado in sidii ugu habboonayd loo adeegsanayo,
- In la fahmo tallaabooyinka ku habboon ee lagu yareynayo Raad-reebka suurtagalka ah ee qorshaha mashruuca,
- In la fududeeyo go'aan qaadasho dhammasytiran oo ay ku jiraan isku-jaangoynta deegaanka iyo qorsahayaasha mashruuca.

Ujeeddooyinka Muddada Dheer:

- Ilaalinta caafimaadka iyo bedbaadada aadanaha,
- Ka fogaanshaha isbeddellada aan laga soo kaban karin iyo waxyeellada halista ah ee deegaanka soo gaadhaysa,
- In la ilaaliyo kheyraadka muhiimka ah, habnololeedka iyo nidaamka deegaanka,
- In la kordhiyo faa’iidada bulsho ee mashruuca la qoondeeyay

3.7. Heerarka QRDB

Heerka QRDB ee looga baahan yahay Somaliland, waa in uu noqdo mid ku habboon, baaxadda iyo Raad-reebka suurtogalka ah ee mashruucda la qoondeeyay, iyada oo lagu salaynayo nooca

goobta loo qoondeeyay mashruuca. Faham buuxa in laga haysto arrimahan oo dhan ayaa lagama maarmaan u ah go'aanka deraasadda hordhaca ah ee heerka QRDB ee loo baahan yahay.

Heerka iyo tirada marxaladaha qiimeyntu mari doontaa waxay ku xidhnaan doontaa baaxadda la filayo iyo culeyska Raad-reebka deegaanka. Heerka QRDB ee looga baahan yahay mashriicdu wuu kala duwanaan doonaa, laakiin guud ahaan heerarkan waxaa ku jiri doona saddexdan qaybood ee waaweyn ee soo socda:

- Mashruucyo yaryar kuwaas oo si fudud loo ogaan karo raadreebkooda taban ee ay ku yaalan karaan deegaanka, isla markaana si fudud loo garan karo tallaabooyinka lagu yaraynanyo Raad-reebka taban ee ku iman kara deegaanka, laguna dari karo qorshaynta iyo fulinta mashruuca.

  Arrimaha deegaanka khuseeya ee mashaariicdan yaryar ayaa sida caadiga ah lagu jaangoynayaa ansixintooda, iyada oo la isla meeldhigayo tallaabooyinka lagu yaraynayo Raad-reebka aan loo baahnayn ee deegaanka ku iman karta. Haddaba mashaariicda noocan ah loogama baahna QRDB oo faahfaahsan oo u baahan deraasado qotodheer oo goobeed.
- Mashaariic aan la hubin Raad-reebka ay deegaanka ku keenayaan, isla markaana looga baahan doono daraasadaha Dib-u-eegista Raad-reebka Deegaanka oo qotodheer leh, si loo fahmo tallaabooyinka ku habboon ee lagu yarayn karo Raad-reebka aan loo baahnayn ee deegaanka ku iman karta. Sidoo kale, waa in la qiimeeyo in QRBD loo baahan yahay iyo in kale. Haddii inta lagu jiro dib u eegista, la aqoonsan karo tallaabooyin lagu yarany karo Raad-reebka, laguna daro qorshaynta mashruuca, waa laga maarmi karaa in la saameeyo Qiimeynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada oo faahfaahsan, waxaana la ansixin karaa mashruuca, iyada oo loo eegayo raadreebkiisa deegaan iyo sida loo maarayn karo.
- Mashruucyo ay caddahay in ay yeelan doonaan raadreeb laxaad leh, kuwaas oo aanay fududayn in la fahmo waxqabadyada lagu yaraynayo raadreebkooda tabani, illaa la sameeyo QRDB oo faahfaahsan. Marka la fulinayo QRDB waa in ay dadweynuhu qayb ka yihiin, kana qaybqaadanayaan.

3.8. Fulinta Hagaha QRDB

Deraasadda QRDB waxa la sameeyaa ka hor inta aan la hirgelin mashaariicda, waxa habboon in la sameeyo ka hor inta aan mashaariicda la siin ruqrsadda ansixinta ama fulinta mashruuca ee ay bixiyaan laamaha mas'uul ka ah bixinta ruqsadda oggolaanshaha Raad-reebka mashruuca.

Inta Badan Saddex hab ayay QRDB u sameeyaan hawlwadeennadu, waxaanay kala yihiin:

a) In deraasadda QRDB ay qayb ka noqoto qorshaynta iyo qaabaynta hore ee mashruuca
b) In deerasadda QRRB la fuliyo ka dib dhammaystirka qaabaynta iyo qorshaynta mashruuca, laakiin ka hor inta aan si dhab ah loo fulinin mashruuca.
c) In deerasadda QRRB la fuliyo ka dib marka mashruuca laga bilaabo goobtii loo qorsheeyay, iyada oo ay inta badan laamaha u xilsaarani joojin karaan mashruuca maaddaama aan hore loo samayn QRDB ee mashruuca.

Sida ku cad shuruudaha QRDB ee Somaliland, habka koowaad (a) ayaa ah midka ugu habboon, xaalad kastana QRDB waa in loo tixgeliyo inay qayb ka tahay qorshaynta iyo qaabaynta dhammaan mashaariicda.

Haddaba, QRDB ee Somaliland waxa uu daaran yahay dardargelinta habka koowaad, balse xoogga ma saarayo labada hab ee kale ee ku xusan tuducyada sare. Gebi ahaan habraaca uu hagahani sharraxayaa waxa uu ku salaysan yahay habka koowaad sida ku cad xeerarka iyo mabaadi'da bud-dhigga u ah QRDB ee Somaliland.

3.9. QRDB Oo Lagu Sidkay Qorshaynta Iyo Qaabaynta Mashruuca

Si loo daboolo ujeeddooyinka QRDB, isla markaana si buuxda loogu daro arrimaha deegaanka la xidhiidha qorshaynta iyo qaabaynta mashruuca, waxa waajib ah in QRDB la sameeyo, iyada oo qayb ka ah wareegga guud ee mashruuca laga soo bilaabo marka ay dhalato fekradda hindisaha mashruucu, falanqaynta suurtagalnimada iyo qaabaynta mashruucaba. Sidaas darteedna, waa in ay aasaas u noqdaan fulinta iyo la socodka mashaariicda, arrimaha la xidhiidha bedqabka deegaanku.

QRDB oo la sameeyo wejiga qorshaynta hore waxa ay muhiim u tahay oo ay hagaysaa cidda mashruuca fulinaysa, si ay u qaabeeyaan mashaariic deegaan ahaan waara, iyada oo siinaysa macluumaadka deegaanka iyo kor u qaadida arrimaha deegaanka ee marxaladaha muhiimka ah ee qaabaynta iyo qorshaynta mashruuca, taas oo horseedaysa mashaariic loo qaabeeyey loona diyaariyey tallaabooyinkii lagu yarayn lahaa Raad-reebka taban ee deegaanka ku iman kara.

Habkan, mashruuc kasta oo la qoondeeyay oo raadreeb taban deegaanka ku keeni kara, raadreebkiisa waa la maarayn karaa, halka mashaariicda ay suurtagalka noqon weydo in maarayntooda la yareeyana, si sahlan loo beddeli karo.

Haddaba, marka QRDB la adeegsado xilligan qaabaynta iyo qorshaynta mashruuca lagu jiro, waxa ay saamaxaysaa in la yareeyo Raad-reebka taban ee aan loo baahnayn ama in la joojiyo mashruucaas haddii aan raadreebkiisa la maarayn karin.

Macluumaadka ka soo baxa deraasadda qiimaynta deegaanka ee marxaladan hore waxa lagu dari karaa dukumentiga mashruuca ee caadiga ah iyo warbixinta kale ee mashruuca ee loogu talagalay ansixinta mashruuca la qoondeeyay. Mashaariicda ay qorshayntooda iyo qaabayntooda ku sidkan tahay QRDB, waxa dib loo eegi doonaa uun in loo meeleeyay waxqabadadii lagu yaran lahaa Raad-reebka deegaanka .

Haddii si dhammaystiran loo fuliyo, oo la sameeyo iyada oo qayb ka ah habka qaabaynta iyo qorsshaynta mashruuca, waxa la hubaa in ay noqon doonto waxa kaliya ee looga baahan yahay cidda mashruuca fulinaysaa in uu yahay buuxinta shruudaha QRDB. Si kastaba ha ahaatee, haddii, Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada oo faahfaahsan la helo, waxay xusi doontaa arrimaha muhiimka ah ee u baahan falanqaynta.

Inta badan, cidda mashruuca fulinaysaa waxa ay u baahan doontaa oo keliya in ay xaqiijiso QRDB oo qayb ka ah wejiga qorshaynta iyo qaabaynta mashruuca si uu u buuxiyo shuruudaha. Laakin haddii mashruuca looga baahdo deraasadda QRDB oo dhammaystiran, waxay xoogga saari doontaa mawduucyada muhiimka ah ee u baahan cilmi baadhis qoto dheer.

CUTUBKA 4AAD

QAYBAHA IYO WEJIYADA QIIMAYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA

4.1.Hordhac

Qaybta hore ee hagahani waxa ay sharraxaysaa qaybaha aasaasiga ah ee geedi-socodka Qiimaynta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada (QRDB) ee Somaliland, oo ay ku jiraan lafagurka, daraasaynta Raad-reebkaa deegaanka iyo go'aan qaadashaduba. Qaybahani waa kuwa ugu muhiimsan ee loo adeegsan karo mashaariicda, gaar ahaan xilliyada qorshayntooda lagu jiro ee aan weli la fulinin.

4.2.Geeddi-socodka QRDB Waxa Uu Ka Kooban Yahay Saddex Weji Oo Kala Ah;

Marxallada 1aad: Hawlaha Aasaasiga ah/ Hannaanka Faaqiddaada (lafagurka)

Xeerka Maareynta Deegaanka ee Xeer Lr. 79/2018, wuxuu waajibinayaa in dhammaan mashaariicda ku qoran qaybta labaad ee xeerka, la mariyo qiimeyn hordhac ah si loo go'aamiyo in deraasad buuxda oo QRDB ah loo baahan yahay. Si kastaba ha ahaatee, tan micnaheedu maaha in dhammaan mashaariicda horumarineed ay raadreeb xun ku keenayaan deegaanka, sidaas darteed dhammaan mashaariicda la qoondeeyay, uma baahna deraasado QRDB oo isku mid ah.

Ujeeddada wejiga faaqidaaddu waa in la go'aamiyo in mashruuc la qoondeeyay uu:-

1. Raadreeb la taaban karo leeyahay ama aanu lahayn. Haddii la ogaado in aanu lahayn wax raadreeb laxaad leh oo taban oo uu ku keeni karo deegaanka, waa in la caddeeyo in laga maarmay QRDB oo faahfaahsan, sidaas awgeedna waa in go'aan ku habboon laga gaadhaa si loo ansixiyo ama loo hirgeliyo mashruuca.
2. Leeyahay raadreeb liddi ku ah deegaanka taas oo tallaabooyinka yaraynta raadreebkiisa taban si fudud loogu aqoonsan karo ama iyada oo loo marayo deraasadda dib-u-eegista Raad-reebka deegaanka. Haddii la ogaado in hannaanka lagu yaraynayo Raad-reebka taban ee mashruucu ay ku filan tahay in laga jawaabo Raad-reebka la aqoosaday, sidii loo ansixin lahaa ee oo loo caddayn lahaa in mashruucaasi aanu dhibaato deegaanka keenaynin.
3. Leeyahay raadreeb laxaad leh oo aan si fudud loo aqoonsan karin tallaabooyinkii iyo habraacyadii lagu yarayn lahaa raadreebkiisa taban, sidaas awgeena loo baahan yahay in la sameeyo deraasad dhammaystiran oo QRDB ah.

- ✓ Cidda mashruuca fulinaysaa waa in ay faahfaahin dheeri ah oo la xidhiidha Raad-reebka uu mashruucu ka tegi karo ku dartaa warbixinteeda hordhaca ah. Warbintan waxa loo gudbin doonaa guddi ku aasaasan xeer, oo loo xilsaaray in ay ka talobixiyaan in mashruuca looga baahan yahay deraasadda QRDB iyo in kale. Haddaba, haddii go'aan laga gaadho in la sii daayo mashruuc ama la oggolaado Raad-reebka uu ku keenayo deegaanka, iyada oo lagu salaynayo habraacyada lagu yaraynayo raadreebkiisa taban, go'aankaas waa in ay qayb ka tahay **Shahaadada Ansixinta ee QRDB** oo ay bixisay laanta u xilsaaran ee WDIC.
- ✓ Si kastaba ha ahaatee, haddii ay caddaato in mashruucu uu u baahan yahay in la sameeyo deraasadda QRDB oo faahfaahsan, shahaadadan kor ku xusan waxa cidda mashruuca fulinaysa la siin doonaa uun marka la aqbalo ee lagu qanco caddaynta Raad-reebka deegaanka ee mashruuca.

Marxalladda 2aad: Deraasadda Raad-reebka Deegaanka

Marxalladdani waxa ay daaran tahay in la aqoonsado Raad-reebka la saadaalin karo

Xayndaabka

Waxqabadyadan waa in intii suutgal ah lagala tashadaa dadka ay sida tooska ah u taabanayaan iyo sidoo kale ururrada aan dawliga ahayn, ganacsatada iyo danayeeyaaasha kale. Waa in la soo qabanqaabiyo kulanno ay qaybaha bulshadu soo jeedin iyo ra'yidhiibasho deraasadda la xidhiidha ku soo bandigi karaan.

Sidaas awgeed, waxa ay kooxdani si wadajir ah isula meeldhigi karaan Raad-reebka suurtagalka ah ee uu mashruuca la qoondeeyay deegaanka ku keeni karo, iyada oo marwalba uu hagayo isku dubbaridaha kulanka soo qaban qaabiyey. Sidoo kale, kooxdani iyaga oo kaashanaya laamaha awoodda u leh waxa ay isla meeldhigi karaan xayndaabka iyo baaxadda mashruuca, raadreebkiisa iyo ahmiyadda uu u leeyahay dhaqalaha gudaha, bulshada iyo deegaanka laga fulinayaba.

4.3. Deraasadda Sahanqaadka Mashruuca

Deraasaddani waa in sharrax guud laga bixiyo deegaanka, nolosha iyo habka-dhaqandhaqaale ee bulshada degaanka ku ah goobta mashruuca laga fulinayo.

4.4.Deraasadda Raad-reebka

Caadi ahaan, Raad-reebka uu mashruucu ku yeelan karo deegaanka waxa qiimeeyaa koox, waxaanay qiimeyntooda u maraan laba habraac;

- In tiro ahaan lagu qiimeeyo isbeddelka iman kara, si loo cabbiro Raad-reebka

- In la adeegsado hab aan tiro ku dhisnayn oo ay adag tahay in tiro ahaan lagu cabbiro Raad-reebka, laakiin ku salaynsan in la oddoroso in deegaanku u dulqaadan karo mashruuca iyo in kale.

Habkan tiro ahaanta ku dhisan ee isbeddellada lagu qiimaynayaa waxa uu tiro ahaan innoogu muujin karaa Raad-reebka, waxaana ka mid ah:-

- **Tayada biyaha iyo deraasayntooda**: In uu mashruuc la qoondeeyay dhikhayn doono biyaha dadwenuhu ay manafacsadaan, wax ka beddeli doono qulqulka biyaha, ama uu yarayn doono biyaha dhulka hoostiisa ku jira, cabbir go'an.
- **Dadka iyo guriyaynta**: In uu mashruuc la qoondeeyay barakicin doono dad aad u tiro badan, sababi karo in tirada dadku ay isku badato.
- **Deraasaynta Dhulka**: In mashruuc la qoondeeeyay uu dadka iyo dhismayaasha u horseedi karo khataro waaweyn sida dhulgariir, dhul-dillaac ama carro-guur.
- **Khayraadka nool**: In mashruuc la qoondyeeyay uu meesha ka saraayo ama dabargoynayo dhir, xayawaan; ama in uu kalluunka iyo xayawaanka duur-joogta ah noloshooda wax u dhimayo.
- **Tayada hawaha**: In uu mashruuc la qoondeeyay keeni karo in hawada lagu sii daayo walxo aan loo baahnayn ama uu si degdeg ah u yaraynayo tayada hawada.

Habka aan tirada ku dhisnayn, waxa lagu qeexaa hannaanka loo sharraxayo loona soo jeedinayo xogta Raad-reebka shay aan tiro ahaan lagu cabbiri karin. Hase ahaatee, isbeddeladaas aan tiro ahaan la cabbiri karin waxa ay waxyeello ku keeni karaan deegaanka iyo tayadii bilicda deegaanka dabiiciga ah. Habkan waxa lagu dersaa in:

- Mashruuc la qoondeeyay uu raadreeb iyo isbeddel ku keeni karo habnololeedyada dabiiciga ah iyo dhulka aan cagtu ku badanyn
- Mashruuc la qoondeeyay uu yarayn karo iftiinka cadceedda ama uu horseedi karo in hadh ama yara mugdi xiga laga dareemo meelaha ay bulshadu ku nooshahay
- Mashruuc la qoondeeyay uu la jaanqaadayo hagayaasha iyo yoolasha laga leeyahay tayada muuqaallada dabiiciga ah, ama in uu ku keenayo iftiin siyaado ah meelaha ka ag dhaw mashruuca.

4.5. Aqoonsashada Habraacyada Yaraynta Raad-reebka Taban

Hagaha QRDB waxa uu isku deyayaa in la helo fekerro tiro badan oo isu dhigma, isla markaana la isku doorsan karo, si loo ogaado habka ugu habboon ee dhaqaale ahaan iyo deegaan ahaanba uu

mashruucu faa’iido ku yeelanayo. Marka faaqidaadda lagu sameynayo jidadka isu-dhigma, la iskuna doorsan karo ee mashruuca la qoondeeyay waa in qiimaynta lagu daro habboonaanta ama liidashadeeda, iyada oo laga eegayo dhanka:

- Tiknoolajiyadda iyo qaababka farsamo
- Kharashaadka deegaanka la xidhiidha ee jid kasta uu leeyahay
- Waafaqsananaanta xeerarka iyo nidaamka sharci ee jira
- Khasaaraha iyo faa’iidada uu leeyahay jidkasta oo la raaci karo, iyo goobaha kale ee ku habboon in mashruuuca laga fuliyo.

Haddaba, inta faaqidista iyo lafagurka noocan ah lagu guda jiro. Waa in isbarbardhig lagu sameeyoo waxyeellada deegaanka soo gaadhaysa iyo faa’iidada jid kasta oo suurtagal ah, si faham buuxa looga qaato habraacyada isu-dhigma ee lagu yarayn karo Raad-reebka.

Kooxda u xilsaarani waa in ay qiimeeyaan habka meesha looga saari karo Raad-reebka laguna maarayn karo, yaranta Raad-reebka laxaadka leh iyo kasoo kabashada ama magdhawga cidda mashruuca fulinaysa looga bahan yahay jid kasta oo deraasad lagu aqoonsaday. Sidoo kale, waxa kooxda looga baahan yahay in ay isla meeldhigaan habka kor loogu qaadi karo faa’iidada mashruucu u leehayay deegaanka. Intaas waxa dheer, qiimaha kharashaadka lagu yaraynayo Raad-reebka taban ee aan loo baahnayn waa in lagu daraa deraasadda.

4.6.Marxaladda 3aad: Dib-u-eegis iyo Go'aan-qaadasho

Iyada oo laga duulayo in mashruuc la qoondeeyay la fasaxo ama looga baahan yahay deraasaynta habraacyadii lagu yarayn lahaa Raad-reebka taban ee la aqoonsaday, dib u eegistu waxa ay door laxaad leh ka qaadanaysaa in la ansixiyo ama la diiddo fulinta mashruuca la qoondeeyay. Haddii la ansixiyo oo la oggolaado fulinta mashruuca, cidda mashruuca fulinaysaa si toos ah ayay shaqadooda u sii wadanayaan.

Marka go’aan laga gaadho ee la ansixiyo fulinta mashruuca, cidda mashruuca fulinaysa, waxa ku waajib ah in ay mashruuca u fuliso si waafaqsan shuruudaha ku lifaaqan heshiiska ansixinta mashruuca. Go’aanka ay gaadhay cidda mashruuca fulinaysaa iyo jidka ay dooratay iyo sababta ay u dooratay oo faahfaahsan waa in ay ku dartaa warbxinta ay soo gudbinayso ee hordhaca ah. Waxa sidoo kale warbixintan lagu darayaa sababaha loo diidday jidadka kale ee isu-dhigma iyo duruufaha ku xeeran goobta laga beddelay fulinta mashruuca.

Inta mashruucu socdo, ka hor iyo ka dibba, waxa ay waaxda u xilsaarsan ansixinta QRDB talooyin lagu yaraynayo Raad-reebka aan loo baahnayn iyo sida lagu yaraynayo u soo jeedin kartaa cidda

mashruuca fulinaysa, waxaanay go'aan ka gaadhi kartaa sida loo yaraynayo Raad-reebka.

4.7.Faaqidaadda iyo Lafagurka Jidadka Isu-dhigma ee Qiimeynta Raad-reebka

Habraaca QRDB waxa uu marwalba isku deyayaa in mashruuca loo helo jidad isu-dhigma oo la isku beddelan karo, sidaas awgeed waxa uu go'aaminayaa doorashada jidka ugu habboon dhaqaale ahaan iyo deegaan ahaanba. Habraaca QRDB, waa in ay qayb ka yihiin lafagur iyo rogrogis dhinacyo badan taabanaysa oo diiradda lagu saarayo jidadka isu-dhigma ama la isku doorsan karo ee mashruuca la qoondeeyay u bannaaan, kuwaas oo waafaqsan ujeeddooyinka aasaasiga ah ee mashruuca.

Faaqidaadda, rogrogista iyo lafagurkana waxa ku lammaanaan doona qiimayn lagu qiimaynayo habboonaanta iyo goldaloolooyinka uu jidkasta leeyahay, iyada oo loo eegayo:

- Nooca goobta/ goobta u dhiganta goobtii/jidkii hore loogu qoondeeyay mashruuca / goobta laga fulinayo mashruuca;
- Deraasaynta goobta/jidka lagu doorsanayo goobtii/jidkii hore;
- Is-barbardhigga faa'iidada iyo khasaaraha jidka/goobta ;
- Dhaqaale ahaan, kharashka deegaanka la xidhiidha ee gelaya jid walba;
- Tiknoolajiyadda iyo farsamada;
- Iswaafajinta qorshayaasha iyo deegaanka;
- Nooca dhisme ee loo baahan yahay jid/goob walba;
- Hawlgalka, oo ay ku jiraan tamarta iyo agabka kale ee looga baahan karo jid/goob kasta oo lagu doorsanayo goobtii/jidkii hore loo qorsheeyay;
- Raad-reebka la saadaalin karo ee jidadka isu dhigma;
- Khatarta ku gedaamana jid kasta, oo ay ku jirto khataraha laxaadka leh ee caafimaadka bulshada waxyeellayn kara;
- Noolayaasha khatarta ugu jira ama sii dabar go'aya, in aanu waxyeello ku keenaynin mashruuca la fulinayaa;
- In aanu mashruucu ka hor imanaynin shuruucda, xeerarka, qorshayaasha iyo habraacyada kale ee jira IWM;
- Mashruuc aanu jid kale u bannanayn

Marka lafagurka iyo faaqidaadda lagu samaynayo jidadka isu dhigma ama la isku doorsan karo ee mashruuca u bannaan, waa in isbarbardhig lagu sameeyo oo la isu miisaamo faa'iidada iyo khasaaraha jidka kasta, iyada oo laga eegayo dhanka waxyeellada deegaanka soo gaadhaysa iyo

kharashaadka ku baxaya.

Soo jeedinta iyo tilmaamaha jidka la doorbidayo iyo sababta loo doortayba waa in lagu daro gorfaynta iyo lafagurka. Haddaba, haddii jidka la doorbidayaa aanu ahayn midka ugu Raad-reebka yar leh, waa in faahfaahin la xidhiidha sababaha loo doortay lagu daro wejiga gorfeynta mashruuca. Faaqidadda faa'iidooyinka dhaqaale iyo deegaan ee ku gedaaman jidadka la isku doorsan karaa, waxa ay gacan weyn ka geysanaysaa hannaanka go'aan qaadashada. Haddii aanay suurtagal ahayn in la cayimo dhaqaalaha iyo kharashaadka la xidhiidha Raad-reebka la aqoonsaday ee deegaanka soo gaadhaya, iyada oo lagu salaynayo jidadka isu dhigma, waxa looga wareeji karaa habraacyo kale oo saamaxaya in go'aan laga gaadho jidka la raacayo. Waxa loo baahan doonaa in la qabto kulan aqoonneedyo ay qayb ka yihiin daneeyayaasha ku lug leh mashruuca la fulinayo, waxaana derajooyin loo kala samayn doonaa jidadka suurtagal ah ee u bannaan fulinta mashruuca, iyada oo la eegayo raadreebkooda. Sidoo kale, waxa la adeegsan doonaa xeelado ku habboon oo suurtagelinaya in mashruuca faa'iidadiisa la gorfeeyo lana miisaamo. Haddaba, marka deraasadda la dhammaystiro, waa in la diyaariyo Warbixinta Caddyanta Raad-reebka Deegaanka.

4.8.Qiimaynta Hantidhawrka Deegaanka

Kormeeridda mashaariicdu waxa ay wax ku ool tahay, ka dib marka la sameeyo deraasadda QRDB, si loo hubiyo in habraacyada iyo tallaabooyinka lagu yaraynayo Raad-reebka taban ee mashruucu ay waafaqsan yihiin meeqaamka, qorshayaasha iyo nidaamka sharci ee jira.

Cidda mashruuca fulinaysa waxa looga baahan yahay in warbixinteeda Caddaynta Raad-reebka Deegaanka ama warbixinta hordhaca ah ee mashruuca ay ku soo darto habraacyada lagu yaraynayo raadreebyada la saadaalin karo.

Hantidhawrka Deegaanka: waxa looga jeedaa hab isku-qoofalan oo ay wehliso xog kaydin muddaysan, laguna dersayo guud ahaan arrimaha deegaanka, habmaamulkooda, qalabka la adeegsanayo iyo khayraadka kale ee la hayo sida loo madhxin karo, loogana faa'iidaysan karo sida ugu habboon.

Hantidhawrka deegaanka waxa mas'uul ka ah oo u xilsaaran Wasaaradda Deeegaanka iyo Isbeddelka Cimilada iyo Wakaaladaha Hormoodka ah. Inta aan mashruuca la bilaabin iyo ka dib marka la dhammaystiraba, waxa cidda mashruuca fulinaysa looga baahan yahay warbixin aasaasi ah oo la xidhiidha Hantidhawrka Deegaanka, waxaana loo gudbinayaa Agaasimaha Guud.

4.9.Baadhista Deegaanka Ee Ay Samayso Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimmiladu

Waa in baadhe loo xil-saaraa, in uu baadhis ku soo sameeyo goobta, mashruuca ama waxqabadka kale ee laga soo sameeyay warbxinta hordhaca ah ee mashruuca ama Caddaynta Raad-reebka Deegaanka, si loo xaqiijiyo Caddaynta Raad-reebka Deegaanka.

4.10. Habraacyada Yaraynta Raad-reebka Deegaanka

Habraacyada yaraynta Raad-reebka waa habka ay cidda mashruuca fulinaysaa ugu talagashay in ay ku yarayso Raad-reebka uu sababi karo mashruuc la qoondeeyay. Ujeeddada laga leeyahay habraacyadani waa in la meeleeyo jidad la isku doorsan karo haddii uu mashruucu leeyahay raadreeb taban, si meesha looga saaro ama loo yareeyo Raad-reebkaas, korna loogu qaado faa'iidada mashruuca. Habraacyada iyo qorshayaasha kale ee Raad-reebka lagu yaraynayo, waa in ay ku jiraan:

a) Garwaaqsiga iyo soo koobidda dhammaan Raad-reebka taban ee la filayo in uu soo gaadho deegaanka
b) Faahfaahinta habka lagu yaraynayo Raad-reebka taban, iyada oo la caddaynayo nooca Raad-reebka iyo sida looga jawaabayo oo ay wehliyaan agabka iyo habraacyada kale ee lagama maarmaanka u ah yaranta Raad-reebka la xaqiijiyey.
c) Faahfaahin la xidhiidha hannaanka kormeeridda barnaamijka
d) Hannaan kormeer iyo xog-wadaagiseed oo u qaabaysan sidii goor hore loo ogaan lahaa khaladaadka jira, tallaabooyin sixitaan oo ku habboonna loo qaadi lahaa. Sidoo kale, habkii loo heli lahaa warbixin ku saabsan waxqabadka mashruuca, natiijada laga gaadhay habraacyadii yaraynta Raad-reebka iyo aqoonsiga awoodda hay'adda/laanta.

4.11. Amarrada Sixitaanka Ah

Marka ay cidda mashruuca fulinaysaa ku guuldarraysato in ay Raad-reebka yarayso, si waafaqsan Caddaynta Raad-reebka Deegaanka ee ay soo gudbisay, waxa uu baadhuhu siin doonaa wargelin sixitaan, ama waxa uu bilaabi doonaa eedayn faldembiyeed ama dacwad madani ah si waafaqsan Xeer Lr. 79/2018.

Tallaabooyinka Aasaasigga Ah Ee Hannaanka Deraaradda QRDB Ee Somaliland

Tallabada 1aad	Cidda mashruuca fulinaysaa waxa ay warbixinta hordhaca ah ee mashruuca u soo gudbinaysaa WDIC iyo wakalaadaha kale ee hormoodka ka ah, isla markaana ku habboon in loo gudbiyo warbixinta. Warbixinta hordahaca ah ee mashruucu waa in ay hoosta ka xarriiqayso in mashruuca ama waxqabadka la qoondeeyay uu raadreeb laxaad leh ugu yeelanayo deegaanka iyo in kale.
Tallaabada 2aad	Iyada oo laga shidaal qaadanayo xogta ku xusan warbixinta hordhaca ah ee mashruuca, WDIC oo la tashanaysa wakaaladda kale ee hormoodka ahi, waxa ay samayn doontaa lafagur lagu oddorasayo in warbixinta hordhaca ah ee mashruucu ay daboolayso arrimaha deegaanka khuseeya iyo in loo baahan yahay deraasad qoto-dheer oo QRDB, haddii aan hore loo samayn.
Tallaabada 3aad	Waxa cidda mashruuca fulinaysa la ogeysiin doonaa go'aanka la gaadhay, si loogu wargeliyo in deraasad dheeri ah loo baahan yahay iyo in kale. Haddii ay warbixinta hordhaca ah ee mashruucu daboolayso dhammaan arrimaha deegaanka khuseeya, waa la ansixin karaa iyada oo aan loo baahanin deraasad dheeri ah.
Tallaabada 4aad	Haddii aanay Warbinta Hordhaca ah ee Mashruucu ahayn mid dabooli karta arrimaha deegaanka khuseeya, waxa loo baahan doonaa deraasad dhammaytiran oo ku saabsan Raad-reebka deegaanka, si loo ogaado Raad-reebka laga yaabo in uu deegaanka soo gaadhayo iyo xayndaabkiisa, si loo qoro heeshiis fulineed, WDIC ay u ansixiso.
Tallaabada 5aad	Deeraasadda Raad-reebka Deegaanka waxa lagu salayn doonaa heshiiska fulineed ee la ansixiyey.
Tallaabada 6aad	Makra ay dhammaato deraasaddu, Caddaynta Raad-reebka Deegaanka waxa loo gudbinayaa WDIC, waxaana lagu samayn doonaa dib-u-eegis, iyada lagala tashanayo wakaaladaha hormoodka ah iyo daneeyayaasha. Iyada oo laga duuleyo nooca Raad-reebka deegaanka, waa in ay dadweynaha lagaga arrinsanado, gaar ahaan arrimaha lagu kala aragti duwan yahay raadreebkooda deegaan.
Tallaabada 7aad	Iyada oo laga shidaal qaadanayo dib-u-eegista Caddaynta Raad-reebka Deegaanka, waxa la gaadhayaa go'aanka kama dambaysta ah ee la xidhiidha dhanka deegaanka ee mashruuca.

Fiiro Gaar Ah: Rukunka aasaasiga ah ee wejiga faaqidaaddu waxa uu dhigayaa in mashruuc kasta oo horumarineed aanu ahayn mid raadreeb taban ku sababaya deegaanka, iyada oo sababta ugu weyni ay tahay nooca iyo baaxadda mashruuca la qoondeeyay iyo goobta laga fulinayo. Sidaas awgeed, mashruuc kasta oo la qoondeeyay uma baahna deraasadda RDDB, qiimeeyn isku mid ahna uma baahna dhammaan mashaariicdu. Haddaba, ujeeddada ugu weyn ee faaqiidaaddu waa in la aqoonsado nooca qiimayneed ama deraasadeed ee looga baahan yahay mashruuca la qoondeeyay. Sidoo kale, QRDB waxa uu sii meel-mariyaa hannaankii loo kormeeri lahaa loona qiimeyn lahaa mashruuca la asnixiyey. Sidoo kale, waxa ay cidda mashruuca fulinaysa iyo laamaha u xilsaaranba u fududaynaysaa in ay si dhaw u kormeerto ulana socoto xaaladda mashruuca la ansixiyey.

CUTUBKA 5AAD

QAABDHISMEEDKA HAY'ADEED EE QIIMEYNTA RAAD-REEBKA DEEGAANKA IYO BULSHADA

5.1. Hordhac

5.1.1. Laanta Maaraaynta QRDB

Waasaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada (WDIC), gaar ahaan Waaxda Ilaalinta Deegaanka ayaa mas'uul ka ah hirgelinta QRDB. Mas'uuliyaddan waxa soo hoosgelaya hawlo badan oo ay ka mid yihiin faaqidaadda mashaariicda la fulinayo iyo talasiinta cidda mashruuca fulinaysa lagula talinayo hannaankii ay u mari lahaayeen mashruuca la fulinayo. Haddaba, marka loo baahdo in la sameeyo faqiidaad ama deraasad QRDB oo faahfaahsan, laantu waxa ay ansixin doontaa heshiiska hawl-fulinta marka ay hesho warbixinta QRDB. Sidoo kale, QRDB waxa ay mas'uul ka tahay dib-u-eegista warbixinta QRDB, anisixinteeda iyo tallooyinka sixitaanka QRDB. Laanta QRDB waxa ay mas'uul ka tahay in loo hogaansamo habraacyada yaraynta Raad-reebka deegaanka, si loo ilaaliyo deegaanka.

Intaas waxa dheer, laanta QRDB waa in ay ka talo bixiso habraacyada loo higelinayo deraasasadda QRDB iyo cidda qayb ka noqonaysa samaynta QRDB. Habraacyada iyo hagayaasha hirgelinta QRDB waxa ay hoosta ka xarriiqayaan waxyaabaha bud-dhigga u ah deraasaddan iyo nidaamka, mabadi'da ama awaamiirta la wafaajinayo QRDB. Inta badan laamaha maamulka QRDB waxa ay ogsoon yihiin baahidan farsamo ee jirta. Sidaas awgeed, wadaagayaashani waxa ay sameeyeen hagayaal hoosa ka xarriiqaya arrimaha deegaanka, Raad-reebka deegaanka iyo tallaabooyinkii ku habboonaa ee lagu yarayn lahaa Raad-reebka taban ee aan loo baahnayn.

5.2. Cidda Mashruuca Fulinaysa

Cidda mashruuca fulinaysaa waa cidda ay sida tooska ah mas'uuliyaddu uga saaran tahay ee gacanta ku haysa mashruuca la fulinayo. Cidda mashruuca mas'uuulka ka ahi waxa ay noqon kartaa laan gaar loo leeyahay, laan dawli ah, laan iskaashi ku dhisan ama mid kaleba. Haddaba, cidda mashruuca fulinaysa waxa waajib ku ah in ay si cilmiyaysan u sugaan xogaha aasaasiga ah ee QRDB. Waxa suurtagal ah in cidda mashruuca fulinaysaa ay heshiis la gasho khabiirro ka caawiya deraasadda QRDB. Sidoo kale, cidda mashruuca gacanta ku haysaa waxa ay u xilsaarsan tahay soo gudbinta warbixinta QRDB, in kasta oo ay kala duwan yihiin noocyada warbxinta looga baahan yahay mashaariicda kala duwan. Faaqidaadda hordhaca ah, warbixnta looga baahan yahay ma aha mid aad u qoto-dheer. Warbixinta QRDB, waxa lagama maarmaan ah in ay noqoto mid

aad u faahfaahsan. Sidoo kale, waxa ay QRDB u baahan tahay in la sameeyo xog-baadhis iyo xog-ururin nidaamsan oo lagu indha-indhaynayo Raad-reebka deegaanka uu ku reebi karo mashruucu. Haddaba, si loo helo deraasad qoto-dheer oo QRDB ee mashruuca, cidda mashruuca fulinaysaa caadi ahaan iyada ayaa u xilsaaraan sidii loo heli lahaa nooca xogeed ee loo baahana yahay. Maaddaama ay deraasadda QRDB, qayb ka tahay sahanqaadka hore ka hor inta aan mashruuca la bilaabin (feasibility study), xogo badan oo looga baahan lahaa kooxda QRDB waxa daboolaysa xogta sahanqaadka ah ee mashruuca.

Haddaba, marka dib-u-eegista la samaynayo, waa in ay cidda mashruuca fulinaysaa diyaar u tahay ka jawaabista su'aalaha mashruuca la xidhiidha, baaxadda raadreebkiisa iyo habraacyada kale ee loo meeleeyay ilaalinta deegaanka. Sidoo kale, cidda ama qofka mashruuca fulinaysa waxa uu xil ka saaran yahay, hirgelinta habraacyada yaraynta Raad-reebka mashruuca. Si kastaba ha ahaatee, Wasaaradda Deeganka iyo Isbeddelka Cimiladu waxa ay si joogta ah u kormeeri doontaa mashaariicda, si waafaqsan Xeerka Maaraynta Deegaanka, 2018.

5.3. Hawlwadeennada Deegaanka

Hawlwadeennada deegaanku waxa ay noqon karaan cidda mashruuca fulinaysa, laanta QRDB iyo laamaha dawladda ee mashaariicda fulinaya. Sidoo kale, hawlwaeennada deegaanku waxa ay noqon karaan, lataliyayaal madaxbannaan, shaqaalaha cidda mashruuca fulinaysa, laamaha horumarinta iyo kaabayaasha ee dawladda, goobaha cilmiga lagu derso, jaamacadaha iyo mac'haddada farasamada gacanta.

Dhammaan qaybahan kor ku xusani waxa ay tixgelin iyo saamayn weyn ku leeyihiin farsamo ahaan iyo cilmi ahaanba, hannaanka dib-u-eegista QRDB. Hawlwadeennadani waa kuwo aqoon ahaan muddo ku soo jirey aqoon durugsanna u leh hannaanka ay ka tala bixinayaan. Aqoontan, waxa looga faa'iieysanayaa in lagu taageero, laguna haqabtiro baahida cidda mashruuca fulinaysaa ay u qabto hannaanka deraasadda QRDB, si loo sameeyo hagayaal lagu dersayo Raad-reebka.

Inta badan, Hawlwadeennada QRDB, waxa ay talo-bixin u soo jeediyaan laanta QRDB. Way jiraan laamaha QRDB oo ay ka hawlgalaan xirfadlayaan aqoon durugsan u leh la tacaalista arrimaha deegaanka khuseeya ee ay la kulmaan. Mararka qaarkood, laamaha QRDB waxa ay u baahdaan shaqaale dheeri ah oo ka taageera faaqidaadda mashruuca, dib-u-eegista heshiisyada hawfulineed, iyo dib-u-eegista QRDB. Guddiga joogtada ah ee wadaagaha iyo xubnaha kale ee u xilsaaran dib-u-eegsita, waxa lagu kaabi karaa hawlwadeenno madax-bannaan.

Cidda mashruuca fulinaysaa waxa ay si weyn hawlwadeennada ugaga baahanaysaa diyaarinta

Heshiiska Hawlfulinta si waafaqsan hagahan; marka la samaynayo deraasadda QRDB, qaabaynta habraacyada yaraynta Raad-reebka mashruuca; diyaarinta warbixinta QRDB, qorshayaasha maaraynta deegaanka iyo bulshada, kormeeridda iyo hantidhawrka deegaanka.

5.4. Laamaha Kale Ee Dawliga Ah

Deeraasaynta QRDB waxa ay inta badan xidhiidh la leedahay ansixinta mashruuca. Mas'uuliyadda ansixinta mashruuca ee kama dambaysta ahi waxa ay ka go'daa laanta qorshaynta ama horumarinta maaliyadda. Laamahanina inta badan qayb ayay ka yihiin hannaanka deraasadda QRDB. Bar bilowga ansixinta mashruuca, laantani waxa ay hubinyaa in cidda mashruuca fulinaysaa ay fahamsan tahay kana war hayso hannaanka QRDB. Sidoo kale, waxa ay laamahani cidda mashruuca fulinaysa u soo gudbin doonaan Laanta Maamulka QRDB.

Waaxda qorshayntu waxa ay sidoo kale, ku lug leedahay maaraynta deegaanka iyo kormeeridda qorshayaasha. Intaas waxa dheer, waxa ay door muhiim ah ka qaadan kartaa hubinta in habraaca ilaalinta deegaanka iyo sahanqaaadka mashruucu ay is waafaqsan yihiin. Marka ay Laanta Maaraynta QRDB dhammaystirto dib-u-eegisteeda, laanta ka mas'uulka ah ansixinta mashruucu, waxa ay qaadan doontaa go'aanka ama soojeedinta Laanta Maaraynta QRDB, si ay ugu darto hannaankeeda go'aan qaadasho.

Heerka wadashaqayneed ee u dhexeeya labada laamood ama wakaaladood ayaa jaangoynaya heerka Raad-reebka deegaanka, si loo gaadho go'aanka kama dambaysta ah ee ansixinta mashruuca.

Laamaha kale ee dawliga ahina sidoo kale waxa uu xil ka saaran yahay maaraynta iyo dhawrista khayraadka deegaanka, horumarinta bulshada, caafimaadka guud iyo horumarinta dhaqaalaha. Sidaas awgeed, haddii uu mashruuc, wadaagayaashan mid ama in kaban raadreeb ku yaalanayo. Laamaha mas'uuliyadda tooska ahi saaran tahay wadaayashani, waa in ay fursad u helan sidii ay uga tala-bixin lahaayeen hannaanka deraasadda QRDB. Laamahan waxa la xidhiidhi doona kooxda samaynaysa deraasadda marka la diyaarinayo warbxinta QRDB, waana in cid metasha laamahan dawliga ah ee wadaayashan u xilsaarani ay jirto, xilliga dib-u-eegista QRDB.

5.5. Dadweynaha

Inta badan mashaariicda horumarintu waa kuwo si toosa u taabanaya dadyaw kala duwan oo kala dano ah. Ka qaybgalka dadweyne ayaa loo baahan yahay, si dadka ay saamaynta mashruucu taabanayso fursad loogu siiyo in ay aqoonsadaan Raad-reebka laxaadka leh ee deegaan iyo bulsho. Deraasadda QRDB ee wax-ku-oolka ahay muhiimad gaar ah siinaysaa arrimaha ay ka

dhawaajiyaan dadwenuhu, xilliga qaabaynta mashruuca, waxaanay isku deyaysaa in ay meeldhigto habraacyada lagu iaalinayo deegaanka. Mashaariic badani waxa ay u fashilmeen sababo la xidhiidha ku habboonaansho la'aan dhaqan-dhaqaale iyo in aanay ka jawaabaynin baahida dhabta ah ee bulshda deegaanka mashruuca laga hirgeliyey.

In kasta oo aanay badi waddamada horumaray si toos ah uga qaybqaadan arriminta QRDB, haddana mararka qaarkood bulshada waxa la tashi la sameeya kooxda diyaarinaysa warbixinta QRDB. Maxaa yeelay, hannaankan dadweynuhu ay talada qaybtooda ku leeyihiin waa dhawaan soo bax ama wuu cusub yahay, waxaana la filayaa in muhiimad leeyahay oo si fiican loo baran doono.

5.6. Laamaha Caalamiga Ah Ee Gargaarka

Badi mashaariicda lagu maalgeliyey deynta ay soo bixiyeen laamaha caalamiga ah ee gargaarku waa in loo sameeyo deraasadda QRDB. Dhammaan Laamaha Caalamiga ah ee Gargaarku waa in ay ogsoonsaadaan in masuuliyadda diyaarinta iyo dib-u-eegista QRDB ay u taallo waddanka la maalgeliyey ama gargaarka la siiyey. Mararka qaarkood Laamaha Caalamiga ah ee Gargaarku waxa ay taageero farsamo ku lahaan karaan hannaanka QRDB, si waafaqsan xeerarka iyo mabaadi'da bud-dhigga u ah deraasadda QRDB ee Somaliland. Taagradan waxa ka mid noqon karta, faaqidaadda mashruuca, lafagurka, diyaarinta Heshiiska Hawlfulinta, talabixnta deraasadda QRDB, diyaarinta warbixinta QRDB, dib-u-eegitsa QRDB iyo diyaarinta shuruudaha, si loo ansixiyo.

Si kastaba ha ahaatee, haddii ay Laamaha Caalmiga ah ee Gargaarku faraha uga qaadaan samaynta deraasadda, waddanka la taageerada loo fidiyey, waxa ay deraadda QRDB looga baahan yahay in ay noqoto mid daboolaysa baahida deeqbixiyaha. Laamaha caalamiiga ah ee gargaarku waxa ay dib u eegi doonaan warbixinta QRDB ee loo gudbiyey, waxaanaygo'aansan doonaan in ay maalgeliyaan ama diiddaan mashruuca la qoondeeyay. Haddii ay mashruuca ansixiyaan waxa ay ku lifaaqi doonaan shuruudaha guud eel agama maarmaanka u ah dhammaytirka mashruuca. Ka dib marka shaqada mashruuca la bilaabo, Laamaha Caalaamiga ee Gargaarku waxa ay sameyn doonaan qiimeyn lagu ogaanayo sida uu mashruucu u fuley.

Guud ahaan, Laamaha Caalamiga ah ee Gargaarku waxa ay u baahan karaan deraasad qoto-dheer oo QRDB, si ka duwan sida ay deraasadaha QRDB u sameeyaan waddamada soo koroyaa. Inta badan, meeqaamka deraasadda QRDB ee ay u baahan yihiin Laamaha Caalamiga ah ee Gargaarku, waxa ay wax-ku-ool u tahay waddama soo koraya. Sidaas awgeed, waa in kooxda samayaysa

deraasadda QRDB ay deraasadda ku miisaaman meeqaamka Laamaha Caalaamiga ah ee Qargaarku ay ugu talagaleen waddamada soo koraya.

5.7. Xarumaha La Talinta Cilmiga Ku Dhisan

Jaamadaha iyo goobaha kale ee cilmiga lagu dersaa waxa ay door laxaad leh ku leeyihiin hannaanka QRDB. Waxa ay diyarin karaa kooxaha deraasadda QRDB fulinaya, maxaa yeelay waxa ay awood u leeyihiin in ay si fudud u helaan dad aqoono kala duwan ku takhasasay oo kulliyadaha ka hawlgala. Waxa sidoo kale, ay door laxaad lihi uga bannaan yahay hannanka dib-u-eegista deraasadda QRDB, maxaa yeelay waa kuwo dhexdhexaad ah oo ka madaxbannaan mashruuca, waanay adag tahay in la helo cid kale oo dib-u-eegistaas samayn karataa. Jaamacaduhu waa kuwa soo tababaraya ee soo saaraya hawlwadeennada QRDB. Intaas waxa dheer, jaamacaduhu waxa ay hannaankan ku soo krodhin karaan habab cusub oo la kal hufo xogaha, sida Barnaamija Faaqidaadda Xogta Deenaanka iyo hannaano kale oo lagu qiimeyn karo khataraha jira iyada oo la adeesano aaladda Kombiyuutarka.

CUTUBKA 6aad

WADATASHIGA IYO KA QAYBGALKA DADWEYNA EE HANNAANKA QRDB

6.1. Hordhac

Shaki kuma jiro in ka-qaybgalka dadweynaha iyo la-tashigu ay yihiin udubdhexaadka dhammaystirka deraasadaha QRDB. Ka qaybgalka dadweynaha iyo wadasahiga xilli ku habboon iyo si habboon loo qorsheeyay waxay gacan ka geysan doonaan qaabaynta, hirgelinta, fulinta iyo maaraynta waxqabdyada la doondeeyay.

Waxa kale oo ay wanaajisaa wax-ku-oolnimada QRDB. Sidoo kale, ka-qaybgalka dadweynaha iyo wadatashigu waa il-xogeed qiimo leh oo laga ogaan karo Raad-reebka la saadaalin karo, habraacyada lagu yaran karo iyo jidadka kale ee looga wareegi karo haddii loo baahdo.

Indhaha lagama lalin karo faa'iidada ku duugaan ka qaybgalka dadweynaha iyo wadatashiga maxaa yeelay waa hannaan daahfuran oo ku dhisan sababayn iyo gorfayn. Makra la samaynayo deraasadda QRDB waxa lagu saleeyaa wadatashi, laakiin dadweynuhu kama qabqaataan. Ugu yaraan, waa in fursad la siiyo dadweynaha uu sida tooska ah u saamaynayo mashruuca la qoondeeyay, si ay u dhibtaan aragtidooda la xidhiida Raad-reebka uu mashrucu ku yeelaanayo deegaanka iyo bulshadaba.

6.2. Doorka Daneeyeyaasha Ee Ka Qaybgalka Dadweynaha iyo Wadatashiga

Suurtagal ma aha in qof kasta lagala tashado deraasadda QRDB, balse waa in la aqoonsado danayeeyaasha metali kara bulshada oo dhan. Waa ayo daneeyayaashu? Daneeyayaashu waa shaqsiyaadka ama kooxaha danaynaya dhammaytirka mashruuca, qorshaha ama siyaasadda la qoondeeyay, isla markaana ay si toos ah u saamaynayso. Badanaa, marka la aqoonsado daneeyayaasha, waa la kala abla-ableeyaa, waxaana loo kala qaadaa koox koox. Qaybaha ugu muhiimsan ee loo kala abla-ableeyo ama loo kala saarsaaraa waa, daneeyaasha tooska iyo daneeyayaasha dadban. Daneeyayaasha tooska ahi waa kuwa uu sida tooska ah dantooda u taabanayo waxqabadka la qoondeeyay. Tusaale ahaan, bulshada deegaanka ku ah goobta mashruuca loo qoondeeyay.

Daneeyayaasha dadban, waa daneeyayaasha aanu mashruucu sida tooska ah dantooda u samaaynaynin, laakiin awood u leh in ay saamayn ku yeeshaan go'aanka fulinta mashruuca. Tusaale ahaan, Ururrada Aan Dawliga ahayn/ Ururrada Waddaniga ah/ warbaahinta qaranka.

Sidoo kale, waxa kale oo daneeyayaasha loo kala abla-ablayn karaa in loo kala saaro daneeyayaasha gudaha iyo daneeyayaasha dibedda. Daneeyayaasha guduhu waa kooxaha

saamaynta ku leg hannaaka go'aan qaadasha mashruuca, halka ay daneeyayaasha dibeddu yihiin cod kasta oo uu dantiisa si toos ah ama si aan toos ahayn u saamaynayo mashruucu.

Guud ahaan, daneeyayaasha la aqoonsan yahay waa:

- Dadka deegaanka (shaqsiyaad) iyo bulshooyinka (tusaale ahaan, tuulooyiinka)
- Kuwo uu saamaynayo mashruucu. Madaxdhaqameed ama cid kale oo bulshda metesha.
- Xubnaha Golaha Deegaanla ee degmada oo laga tashado sida ay bulshadu mashruuca u aragto
- Bulsho aan deegaan ahayn oo isticmaala khayraadka deegaanka, si joogto ah ama si aan joogto ahayn, sida reer guuraaga
- Qaybaha bulshada sida haweenka, dadka waayeelka ah ama dadka ugu saboolsan bulshada
- Culimada diinta
- Siyaasiyiinta
- Hay'adaha Aan dawliga ahayn ama ururrada aan waddaniga ah
- Ka faa'iideystayaasha, kooxaha ka hortaga tacaddiyada jinsiga ku shisan, ururrada shaqaalaha iyo shirkadaha
- Ganacsatada iyo rugta ganacsiga
- Warbaahinta kala duwan (jaraa'iddada, raadiyaha, tilifeeshinnada); iyo
- Waraasadaha Qaranka, dawlaha hoose iyo waaxaha kale ee dastuuriga ah.

Kooxaha kale ee u xilsaaran wadaagayaasha ay suurtagalka tahay in mashruucu uu Raad-reebka ku yeesho, sida caafimaadka iyo khayraadka dabiiciga ah, ayaa ah kuwa ugu hooseeya ee meteli kara dadweynaha marka loo baahan yahay in la sameeyo wadatashi iyo ka qaybgal dadweyne oo ku saabsan dib-u-eegista QRDB. Deraasadda QRDB waxa ay fursad siinaysaa cilmibaadhayaasha khibradda u leh deegaanka ay saamaynayso. Waa laga yaabaa in ay jiraan daneeyayaal kale oo u baahan in laga qaybgeliyo. Qof kasta oo dadweynaha waddanka ka mid ah oo danaynayaa wuu ka qaybgeli karaa hannaanka QRDB.

6.3. Ujeeddooyinka Wadatashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha

A. In la fahmo doorka, ujeedddooyinka, iyo muhiimadda uu ka qaybgallka dadweynuhu u leeyahay QRDB iyo hannaanka go'aan qaadashada.

B. In la aqoonsado doorarka ay dadweynuhu ka qaadan karaan wejiyada kala duwan ee QRDB

C. In la fahmo daneeyayaasha ugu mudan

D. In la aqoonsado habraacyada iyo xeeladaha kale ee loo adeegsan karo hannaankan

E. In la meeleeyo mabaadi'da hagaya wadatashiga daneeyayaasha ee muhiimka ah
F. In la dardargeliyo lana dhiirrigeliyo aragtidhiibasha dadweynaha ee la xidhiidha waxqabadyada horumarka iyo la shaqaynta daneeyayaasha
G. In dadweynaha la ogeysiisyo mashruuca la qoondeeyay iyo Raad-reebka laga filan karo
H. In la helo dhaqanyaqaanno deegaanka aqoon u leh, lana weyddiiyo aragtidooda, si ay talada qayb uga noqdaan
I. In la fududeeyo sidii loo heli lahaa jidad isu-dhigma oo la isku doorsan karo, iyo habraacyaddii lagu yarayn lahaa Raad-reebka taban.
J. In la hubiyo, sidii aa aan indhaha looga lalin lahayn khasaaraha mashruuca, loona buunbuunin lahayn faa'iida mashruuca
K. In laga sii baaraandego khilaafaadka soo ifbixi kara ee hore loo aqoonsaday
L. In dadweynaha fursad loo siiyo sidii ay talo iyo toosin ugu yaalan lahaayeen qaabaynta mashruuca(si loo deraansiiyo lahaansho)
M. In la kordhiyo daahfurnanta iyo isla-xisaabtanka hannaanka go'aan qaadashada; iyo
N. In hannaanka QRDB lagu kordhiyo kalsoonida dadweynaha

6.4. Muhiimadda Ka Qaybgalka Dadweynaha

Ka qaybgalka dadweyuhu waxa uu uu udub-dhexaad u yahay QRDB. Waxa uu unkaa, isla markaana xoojiyaa hannaanka wadaxidhiidh ee u dhexeeya daneeyayaasha. In bulshada uu mashruucu dantooda sida tooska ah u saamaynayaa ay qayb ka noqoto go'aan qaadashadu waxa ay kor u qaadaynsaa sinnaanta iyo caddaaladda, si loo gaadho go'aanno laga soo baaraan degay oo dhinacyo badan laga eegay. Waaya-aragnimda iyo sooyaalka khibradeed ayaa inna tusaya in ka qaybglak bulshadu uu door laxaad leh ka qaadanayo sidii looo gaadhi lahaa ujeeddooyinka mashruuca. Fa'iidooyinka ka qaybgalka dadweynuhu waxa ay isugu jiraan kuwo la taaban karo iyo kuwo aan la taaban karin oo la dareemi karo. Tusaale ahaan, marka ay daneeyayaashu u arkaan in fekerkoodu muhiim u yahay mashruuca la qoondeeyay, waxa ay arrintaasi kor u qaadaysaa in ay kobciso hankooda iyo kalsoonidooda qofeed. Waxa la odhan karaa badi, hannaannada QRDB ee jiraa waa kuwo ay dadweynuhu si uun uga qayb yihiin. Hase ahaatee, ugu yaraan bulshda uu mashruucu sida tooska ah u saamaynayaa waa in ay fursad u hesho ka qaybgalka go'aanka mashruuca la qooneeyay, si ay uga ra'yi dhiibtaan Raad-reebka uu mashruucu ku yeelan karo deegaanka iyo bulshadaba.

6.5. Ujeeddada Guud ee Ka Qaybgalka Dadweynaha iyo Wadatashiga

Ka qaybgalka dadweynuhu waxa uu lafdhabar u yahay maamul wanaagga. Ka qaybgalka dadweynuhu muhiimado gaar ah ayuu u leeyahay marka la samaynayo Deraasadda Qimeynta Raad-reebka Deegaanka, waxa ka mid ah:

- Waa in la soo martiqaado dadka uu mashruucu sida tooska ah u saamaynayo, si ay qayb uga noqdaan hannaanka go'aan qaadashada, loona xoojiyo caddaaladda, sinnaanta iyo iskaashiga;
- Waa in la ogeysiiyo dadweynaha waxaqabadka la dooneeyay iyo raadreedkiisa taban.
- Waa in xog noloshooda xidhiidh la leh laga ururiyo dadweynaha, tusaale ahaan dahqankooda, hab-nololeedkooda, madaadi'dooda siyaasadeed iyo deegaanka dulled ee ay ku nool yihiin;
- Waa in la sahamiyo lana baadigoobo aragtiga bulshada ee la xidhiidha habraacyada lagu yarayn karo Raad-reebka taban, loona kordhin karo Raad-reebka togan ee mashruuca;
- In la kordhiyo heerka faaqidaadda, si loo gaadho ka raali-ahaanshaha bulsheed;
- In dhammaan dhinacyada kala duwan wacyigooda iyo aqoontooda la kordhiyo, sidoo kale in la horumariyo lana sii dardargeliyo ka qaybgalka bulshda ee ku aaddan QRDB.

6.6. Heerarka Wadashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha

Ka qaybgalka dadweynuhu waxa uu leeyahay heerar kala sarsarreeya oo u samaysan sida jaranjarrada oo kale. Dhammaan hererkan ka qaybgalka dadweynuhuna way kala duwan, heer ka qaybgalka dadweynuhu aanu si toos ah u muuqan illaa heer firfricooni badani ay ka muuqato oo ka qaybgalku uu xooggan yahay. Madalaha furan ee ay dadweynu qaybta ka yihiin iyo kulamada ka dhaca tuulooyinku waa ka qaybgalk firfircoon, maaddaama wadatashiga si toos ah uga qayb yihiin, laakiin kulan aqooneedyadu waa aragti wadaag iyo ka qaybgal dadban. Haddaba, waxa jira shuruudo lagama maarmaan u ah qorshaynta iyo qaabaynta barnaamijyada ka qaybgalka dadweynaha, sida hoos ku xusan:

I. **Xogsiin iyo ogeysiis**, in si xooggan loola hadlo dadweynha laguna baraarujiyo ka qaybgalkoodu waa lagama maarmaan. In xogta la gaadhsiiyo oo keli ahi, kuma filna. Waxa loo danleeyahay waa wadtashi iyo ra'yi wadaag, si daneeyayaasha loogala tashado Raad-reebka mashruuca la qoondeeyay.

II. **Ka qaybqaaasho,** waa hannaan ku dhisan isdhexgal iyo abaabul la abaabulayo cidda ehelka u ah arrimaha la oddorasayo, si loo ogaado aragtiyaha laga mideysan yahay ama lagu kala duwan yahay.

III. **Wada-xaajood**, waa in daneeyayaashu ay isla meeldhigaan jidkii khilaafka looga wareegi lahaa, kaas oo ku salaysan xaqiiqo-raadin, isu-tanaasul la isku qaadanayo danaha kala duwan.

Haddaba, marka sida tooska ah loogu dhaqmayo, ka qaybgalka dadweynuhu ay ka qaybgalayaan hannaanka QRDB, waxa uu u dhigmaa wadatashi. Si kastaba ha ahaatee, marka ay jiraan xaalado badani waxa habboon ka qaybgalka dadweynaha ee tooska ahi, tusaale ahaan marka jiraan duruufaha ay ka mid ka yihiin barakac gudeed, ama marka mashruucii laga beddelo goobtii laga fulin lahaa, iyada oo sababtu ay la xidhiidho mashruuca.

6.7. Aqoonsashada Daneeyayaasha Muhiimka Ah ee Hannaanka QRDB

In la go'aamiyo cidda ka qaybqaadanaysa hannaanka QRDB, waxa ay u baahan tahay feejignaan iyo lafagur qoto-dheer, maxaa yeelay daneeyayaasha la metalayaa waxa ay noqon karaan, qaybaha kala duwan ee bulshada, culimada, haweenka, akadeemiyaha iyo xarumaha cilmibaadhista, ganacsatada, iyo laamaha kale ee dastuuriga ah.

Mid kasta oo kuwan ka mid ahi waxa uu soo jeedin kara ama u ololeyn karaa arrimo gaar ah oo dhnakiisa ka mudan ama uu danaynayo. Waxa laga yaabaaa in go'aanka ay aad ugu dhuundaloolaan kooxaha awoodda iyo saamaynta leh, sida kooxaha dhaqaalaha leh ama hodanka ahi. Sidaas awgeed, waa in laga taxadiro in aragtiyahooda iyo rabitaankoodu aanu halis ku ahayn arrimaha iyo noloshda dadka saboolka ah, ama kooxaha la faquuqo.

Garwaaqsiga arrimahan iyo isu-dheelitirnaanta ama badhaxtirka dadka ka qaybgalaya hannaanka QRDB aad ayuu muhiim u yahay. Haddab, daneeyayaasha ugu muhiimsan wax aka mid ah, laamaha dawladda, laamaha horumarinta, ganacsata iyo suuqyada-gaarka loo leeyahay. Waxa muhiim ah in kooxahan hoos ku xusani ay ka qaybgalaan, ka qaybgalka daneeyayaaashu kama dhigna ka qaybgalka dadweynaha oo keliya, balse wuu ka baaxadweyn yahay.

1. Xubhana bulshada ama kooxaha ka midka ah bulshda uu mashruucu saamaynta tooska ah ku leeyahay, waa in ay ogaadaan mashruuca la qoondeeyay, saamayntiisa suurtagalka ah iyo in tabashooyinkooda la xidhiidha mashruuca loo dhugyeesho. Waxa in si fiican loo dhegaha loogu raariciyo aragtiyahooda, lana qaato aragtiyahood togan. Waxa ay u baahnyihiin in cidda mashruuca fulinaysaa tixgeliso baahiyahooda iyo tabashooyinkooda. Sidoo kale, waxa ay

hayaan aqoon iyo xog la xidhiidha deegaanka iyo bulshadooda, waxaana loo adeegsan karaa in lagu daro xogaha sahanqaadka mashruuca.

2. Fahamka Cidda mashruuca fulinaysa, cidda mashruuca fulinaya waxa ay isku dayaysaa in qorshaha mashruuca ay u dhigto sida ugu wanaagsan ee guul lagaga gaadhi karo. Inta badan, arrintani waxa ay u baahan tahay in dadweynuhu ay fahmaan qorshaha ama qoondada mashruuca, lana gaadhsiiyo xog ku filan. Haddaba, iyada oo laga faa'iideysanayo aqoonta dadweynaha, waxa qaabaynta iyo qorshaynta mashruuca lagu dari karaa habraacyada suurtagal ah ee loo yarayn karo Raad-reebka taban, iyada loo tixgelinayo qiyamka bulshada deegaanka ah.
3. Laaamaha dawliga ah, laamah dawladda ee qaybta ka ah hannaanka QRDB, waxa ay u baahan yihiin in ay siyaasad cad ka lahaadaan mas'uuliyaddooda la xidhiidha lafagurka Raad-reebka iyo habraacyada kale ee lagu yaraynayo Raad-reebka aan loo baahnayn. Marka ay dadweynu qayb ka yihiin qorshaynta iyo qoondaynta mashruuca ay fulanayso laanta awoodda u lihi, waxa laga yaabaa in uu marxaladaha dambe ama wejiyada danbe noqdo mid aan aad la isugu maandhaafsanayn. Ama dadweynuhu ha ka qayb ahaadaan ama yaanay ka ahaanine, laanta u xilsaaran QRDB, waxa ay eegaysaa in mashruucu uu buuxiyey shuruudaha iyo habraacyada, iyo in aanu buuxinin. Talada iyo aqoonta ay laamaha dawladdu soo jeedinayaan inta qorshaynta iyo qoondeynta mashruuca lagu jiraa, waa wax-ku-ool. Si kastaba ha ahaatee, waxa laga yaabaa in xog muhiim ah oo arrinta deegaanka mashruuca laga fulinayo iyo raadreebkiisa si toosa ula xidhiidha, laga helo il-xogeed kale.
4. Ururrad Maxaliga ah iyo kooxaha danaynaya: Aad bay muhiim u tahay xilliga qorshaynta iyo qoondeynta mashruuca, soojeedinta iyo talada Ururrada aan dawliga ahayn, iyo Ururrada bulshda ku salaysani; tusaale ahaan waxa la ogaan karaa xidhiidhka istaraatejiyadeed ee ay ujeeddooyinka mashruucu iyada oo laga eegayo dhanka waaritaanka.

Hase ahaatee, aragtidooda iyo taladoodu waxa ay wax-ku-ool tahay marka ay adag tahay in lala shaqeeyo dadka deegaanka. Si kastaba ha ahaatee, jidkani waa jid kale oo lagu doorsan karo jidka ka qaybgalka dadweynaha ee tooska ah; hase ahaatee, tani kama dhigna jidkani uu si toos ah innoogu shaqaynayo inta ay suurtagalka tahay in dadweynu lagu qanciyo ka qaybgalka tooska ah. Kooxaha kale ee muhiimka ah waxa ka mid ah xeeldheerayaasha u banbaxay arriamaha la oddorasayo, waxaanay waxtar u leeyihiin deraasadda QRDB.

6.8. Faa'iidooyinka Watashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha

Waxa jira faa'iidooyin badan oo laga helo ka qaybgalka dadweynahu ay qaybta ka yihiin hannaanka qorshaynta iyo qoondeynta mashruuca. Koox kasta oo ka mid ah kooxahan soo socdaa waxa ay ka qaybgalka dadweynaha ka filan kartaa faa'iido, waaya-aragnimo ama dan.

Shaxanka 1aad: Faa'iidooyinka Uu Leeyahay Ka Qaybglka Dadweynuhu, Kooxahan Kala Duwan Ee La Soo Xulay		
Cidda Mashruuca Fulinaysa	**Cidda Ay Talada Mashruucu Ka Go'do**	**Bulshada Uu Sida Tooska Ah U Saamaynayo Mashruucu**
Waxa uu kor u qaadaa wacyiga cidda mashruuca fulinaysa ee ku aaddan Raad-reebka uu mashruuca la qoondeeyay ku reebi karo deegaanka iyo bulshada uu sida tooska ah dantooda u taabanayo	In la gaadho go'aan laga soo baaraan-degay oo la hubiyey	Waxa uu siiyaa fursad ay ku sheegtaan tabashooyinkooda iyo aragtidooda, si ay ugu lug yeeshaan hannaanka go'aan qaadashada
Waxa uu xalaaleeyaa mashruuca la qoondeeyay, illaa heer ay bulshadu aqabali karto, taageerina karto	Waxa uu keena madax-buuxin sharci, waxaana la ogaadaa in uu sharciga waafaqsan yahay	Waxa uu siiyaa fursad aqooneed oo suurtgalinysa in ay fahmaan Raad-reebka uu mashruucu deeganka ku reebi karo iyo khatarah ku gedaaman
Waxa uu kordhiya, kalsoonida dadweynuhu ay ku qabaan mashruuca	Waxa uu keenaa daahfurnaan iyo caddaalad, sidoo kale waxa uu laalaa eedayntii soo ifbixi lahayd xilli aan waxba laga qaban karin	Waxa uu kor u qaadaa waciyga bulshada ee la xidhiidha hannaanka go'aan qaadashada iyo sida uu u shaqeeyo ama waxa lagu saleeyo go'aannada la qaadanayo
Waxa uu ka cawiyaa in la helo xog iyo macluumaad ka turjumi kara deegaanka iyo bulshadiisa.	Waxa uu wanaajiyaa xidhiidhka u dhexeeya cidda mashruuca fulinaysa iyo daneeyayaasha kale	Waxa uu awood siisaa bulshada. Waxa kale oo uu siiyaa aqoontii ay kaga qayb noqon lahaayeen hannaanka go'aan qaadashada,

		waxaanu dareensiyaa mas'uuliyadda bulsheed ee saaraan.

6.9. Ka Qaybgalka Dadweynha iyo Wejiyada Kala Duwan ee Hannaanka QRDB

Ka qaybgalka dadweynaha waxa lagu sidkaa wejiyada kala duwan ee deraasadda QRDB:

A. **Faaqidaadda:** Dadweynuhu waxa ay wejigan ku tabarucaan xogo muhiim u ah faaqidaadda mashruuca la qoondeeyay. Intaass waxa dheer, in xilli hore la ogaado bulshada uu mashruucu saamaynta tooska ah ku yeelanayaa waxa ay muhiim u tahay in xogtaas aasaasiga ah la adeegsado Wejiga Sugidda Xayndaabka QRDB.

B. **Xayndaadka:** Ka qaybgalka dadweynuhu waxa uu had iyo jeer muhiim yahay wejiga meelaynta xayndaabka. In la gorfeeyo daneeyayaasha mashruucu taabanayaa, waa hannaan xeeldheerayaasha deraasadda QRDB u fududeeya sidii ay u aqoonsan lahaayeen dhammaan shaqsiyaadka iyo hay'adaha kale ee ku lug leh mashruuca la qoondeeyay iyo qaabeyntiisa. Waxa ay arrintani gacan ka geysanaysaa in la aqoonsado cidda qayb ka noqonaysa hannaanka QRDB, iyo sida uu mashruucu raadreeb ugu yeelanayo kooxo kala duwan.

   Haddaba, waxa aad u habboon in la faaqido lana gorfeeyo daneeyaayasha, marka lagu jiro wejiga sugidda xayndaabka, iyada oo la isku deyayo in la ogaado danta uu daneeye kastaa ka leeyahay mashruuca iyo sida ay ula xidhiidho ujeeddooyinka mashruuca loo fulinayo. Waxa muhiim ah in la ururriyo xoagaha aasaasiga ah ee la xidhiidha goobta mashruuca laga fulinayo iyo goobaha kale ee u dhigma ee loo duwi karo mashruuca haddii Raad-reebka in la yareeyaa ay suurtagal noqon weydo, yada oo lagala tasahnayo dadweynaha.

C. **Gorfaynta iyo Yaranta Raad-reebka:** Xilliga la aqoonsanayo Raad-reebka, waxa lagama maarmaan ah in la ogaado baaxadda Raad-reebka iyo dhammaan jidadka ama habraacyada suurtagalka ah ee lagu yaranayo Raad-reebka, sidaas awgeed aad buu ka qaybgalka dadweynuhu muhiim u yahay wejigan. Xaalado badan, waxa aad loo doorbidi karaa in ka qaybgalka dadweynuhu ka mid noqodo wejiga qorsheynta habraacyada lagu yaraynayo Raad-reebka, sii guul loo gaadho. Keliya ma aha in dadweynaha la qancinayo oo baahi ay leeyihiin la kafaynayo, isla markaana laga qaybgelinayo qorshaynta habraacyada yaraynta Raad-reebka, balse qorshasha laftiisa ayaa u baahan ka qaybgalka dadweynaha. Waxa la filayaa in ay kordhiso hufnaanta iyo si fiican u maaraynta arrimaha deegaanka iyo bulshadaba, maxaa yeelay

cidda ugu horreysa ee ay waxyaalladu soo gaadhayso am aka faa'iidaysa waa bulshada, waana sababta looga qaybgelinayo.

D. **Dib-u-eegista Caddynta Raad-reebka:** Fursadda ugu weyn ee ka qaybgalka dadweyuuhu waxa ay bannaan tahay marka warbixinta QRDB la soo bandhigayo ee ay furan tahay faallada dadweynuhu. Haddaba, way adag tahay in ay qoraal ahaan kaga faallodaan dadweynaha intiisa badani, balse dadka wax bartay iyo kuwa akhris-qoraalka yaqaanna kuma adka. Hab kale oo lagu heli karo jawaabo macquul ah waa la helo marka uu mashrucua la qoondeeyay yahay mid aad loogu kala aragti duwan yahay. Tusaale ahaan, madal fuan ama kulanno xog isweydaarsi oo qayb ka ah dib-u-eegista deraasadda QRDB waa in la soo qaban qaabiyo. Kulannadai waxa ay noqon karaan kuwo rasmi ah ama kuwo aan rasmi ahayn, balse bulshada ay mashruuca saamayntiisu taabanayso u suurtagalinya in ay ra'yigoda dhiibtaan. Way jiraan dad badan ama kooxo aan jeclayn in ay mashraxyada ka hadlaan. Haddaba, marka ay duruufahani jiraan waa in hab kale la adeegsado.

E. **Kormeeridda iyo hantidhawrka**: Mashaariicda intooda badan, waxa raadreebkood deegaan la kormeeri doonaa marka ay shaqada hawlgalka ama dhisamaha bilaabaan, iyada loo sixi doono wixii lagamama maarmaan ah. Dadka deeegaanku waa in ay qayb ka noqdaan hannaanka kormeeridda. Iskaashiga noocan oo kale ahi waxa uu cidda mashruuca fulinaysaa iyo cidday talada mashruucu ka go'daba u suurtaglinyaa in goor hore xal laga gaadho dhibaato kasta oo soo ifbaxda. Waxa ay sidoo kale gacansiinaysaa iskuxidhnida daneeyayaasha iyo busldha deegaanka ee mashruucu raadreebkiisu soo gaadhayo.

6.10. Goorta Ugu Habboon ee Wadatashiga iyo Ka Qaybgalka Dadweynaha

Marka la qorshaynayo mashaariicda uu ka qaybgalka dadweynuhu muhiim u yahay, cidda mashruuca fulinaysaa waa in ay goor hore qorshaha ku dadrsataa ka qaybgalka dadweynaha, ka hor hannaanka QRDB. Sidoo kale, waxa muhiim ah in Heshiiska Hawlfulinta deraasadda QRRB, ay ku cad yihiin wakhtiga, xayndaabka, farsamooyinka iyo khayraadka loo adeegsanayo mashruuca la qoondeeyay. Balse, haddii aanay caddayn dhammaan arriimana kor ku xusani, waa in kooxda deraasadda QRDB fulinaysaa si gaar ah u soo diyaariyaan nuqullo gaar ah, iyaga oo bulshada kala tashanaya. Qorshuhu waa in uu hoosta ka xarriqayo sida bulshda loo ogeysiinayo looguna wargelinayo mashruuca la qoondeeyay iyo hannaanka QRDB. Waa in uu la bilaabmo qorshahaha mashruuca, iyada oo bulshada lala socodsiinayo tallaabo kasta oo la qaadayo, inta lagu jiro deraasadda QRDB, si loo ogaado waxa ay bulshadu ka qabto. Waa in la caddeeyo habka bulshada looga qaybgelinayo, sida loo tixgelinyi aqoontooda iyo qiyamkooda iyo cidda fududaynaysa ka qaybgalka dadweynaha. Si kasta ha haatee, intii suurtagal ah waa in la isku dayo

in kulannadu ay ka qabsoomaan busldaha dhexdeeda, gaar ahaan haddii ay jiraan caqabado hor istaagaya ka qaybgalka bulshadu.

6.11. Caqabadaha Hortaagan Ka Qaybgalka Dadweyanaha:

1. **Fogaanta Deegaannada Miyiga**: Korodhka degellada degsiimo ayaa sababay in wadaxidhiidhku uu adkaado, sidaas awgeedna ka qaygalku uu noqdo mid adag oo kharas u baahan.
2. **Aqoon l'aanta:** waxa ay xaddidaysaa ka qaybgalka adweynha gaar ahaan marka la adeegsanayo xog qoraal ah oo daabacan.
3. **Dhaqanka/Qiyamka Bulshada deegaanka**: dhaqamada soo jireenka iyo habdhaqanka bulshadu waxa ay caqabad ku noqon karaan ka qaybgalka bulshada ama waxa ay caqabad ku yihiin bulshooyinka aan ka hor iman karin kooxaha talada gacanta ku haya.
4. **Saboolnimada**: Inta badan dadku waxa ay ku hawllan yihiin sidii ay nolol maalmeedkooda ula soo bixi lahaayeen, sidaad awgeed kama qaybgeli karaan kulannada dadweynaha loogu talagalay. Ka qaybgalku waxa uu bulshdan ula muuqanayaa wakhti lumis, uu wakhti badan oo ay nolol maalmeedkooda kula soo bixi lahaayeen kaga khasaarayo.
5. **Nidaamka sharci**: Waxa laga yabaa in khilaafayo hannankii dhaqamiga ahaa ee ay bulshadu u soo nooleyd, waxaana isku murugsan xuquuqihii iyo mas'uuliyaddii qofka ka saarnayd adeegsiga khayraadka.
6. **Kooxaha danta gaarka ah leh**: waxa ay horseedaan khilaaf iyo aragti dhan ka raran
7. **Xilqarsiimo**: waxa laga yaabaa in cidda mashruuca fulinaysaa aanay rabin in goor hore ay dadweynuhu ogaadaan mashruuca ama ay wadatashi la sameeyaan.
8. **Danayn la'aan:** kooxaha ama dadka qaarkood ma danaynayaan in ay tagaan kulan ay u malaynayaan in aan faa'iido ugu jirin ama waxaaba soo daashaday kulannada ama hawlaha noocaas ah.

CUTUBKA 7AAD

QIIMEYNTA RAAD-REEBKA BULSHO, CAAFIMAAD IYO DHAQAALE

7.1. Hordhac

Qiimaynta Raad-reebka Bulshada (QRB) waxa ka mid ah hannaanka lafagurka, kormeeridda iyo maaraynta cawaqibka bulsho ee la ogyahay iyo kuwa aan la ogeyn, Raad-reebka waxqabadyada la qorsheeyay (siyaasadaha, barnaamijyada, qorshayaasha, mashaariicda) iyo isbeddelka bulsho ee ay keeni karaan. Ujeeddadeeda koowaad waa sidii loo heli lahaa deegaan nabdoon oo aan waxba u dhimaynin nolosha dadka iyo noolayaasha kale ee deegaanka ku dhaqan.

1. QRB waxa diirradda lagu saarayaa sidii loo gaadhi lahaa maxsuullo togan iyo horumar, balse keliya kuma koobna sidii loo aqoonsan lahaa ama looga jawaabi lahaa cawaaqibka aan lagu talogelin. Intaas waxa dheer, QRB waxa looga golleeyahay sidii looga gacan siin lahaa bulshooyinka iyo daneeyayashabuba in ay aqoonsadadaan yoolasha horumarka, loona kordhin lahaa faa'iidada togan, maaddaama aanay keliya ku koobnayn in waxyeellada uun la yareeyo.
2. Habraaca QRB waxa lagu dabbaqii karaa oo soo hoosgalaya hawlo badan iyo waxqabyada la qorsheeyay, waxaana loo fulinayaa si guud oo ka jawaabaysa baahiyaha daneeyaal badan, balse kale kuma koobna cidda gacanta ku haysa.
3. QRB waxa ay gacan ka geysanaysaa habka loo maaraynayo siyaasadaha, barnaamijyada, qorshayaasha iyo mashaariicda. Sidaas awgeed, waxa u dhigan tahay qaab ka warbixinayaa waxqabyada la qorsheeyay iyo sida loo waajahayo.
4. QRB waxa ay kordhinaysaa aqoonta loo leeyahay bulshada deegaanka iyada oo laga faa'iideysanayo ka qaybgalka bulshada, lana gorfeynayo danaha bulshooyinka uu mashruucu sida tooska ah u taabanayo. Waxa ay daneeyayaasha ka qaybgalinaysaa qiimaynata Raad-reebka bulshada, waxaana lafagur lagu samaynayaa jidkii looga wareegi lahaa, haddii loo baahdo, iyo hannakii loo qiimeyn lahaa waxqabadyada la qorsheeyay.
5. Marka si wanaagsan loo dabbaqayo QRB, waxa la fahmayaa in Raad-reebka bulsho, dhaqaale iyo nolosha deegaanku aanay ahayn kuwo kala madax-bannaan. Isbeddel kasta oo ku dhaca mid kuwan ka mid ahina uu saamaynayo kuwa kale. QRB, waa in uu hoosta ka xarriiqayaa dhammaan Raad-reebka ka dhalan kara marka uu doorsoomayaashan mid ka mid ah isbeddel ku dhaco iyo cawaaqibka uu doorsoomayaasha kale ku keenayo. Sidoo kale, waa in tixgelin la siiyo oo la derso sida uu raadreebku u kala badan yahay, tusaale ahaan waa in

la sheego cawaaqibka u badan iyo ka ku soo xiga ee ka dhalan kara waxqabadka la qorsheeyay.

6. Si wax loga barto hannaan QRB, waa in la gorfeeyo oo la rogrogo raadreebyada ka dhashay waxqabadyadii hore. QRB waa in ay marjac u noqdaan aragtiyaha iyo dhacdooyinka soo jireenka ah ee sheeko iyo shaahid mid uun lagu hayo. Marka QRB lagu dabbaqayo waxqabad la qorsheeyay, waa in la raaco xeeladaha QRB si loo aqoonsado Raad-reebka bulshada iyo halka uu dabada ku hayo, sida masiibooyinka, isbeddelka guud ee bulshada iyo cudurrada.

7.2. Raad-reebka Bulsho

Qiimeynta Raad-reebka Bulshadu (QRB) keliya kuma koobna in ay tahay laan ka mid ah xayndaabka qiimeynta deegaanka. Raad-reebka bulshadu wuu ka ballaadhan yahay qdobada kooban ee la eego marka la fulinayo deraasadaha QRDB, sida isbeddellada qaabdhismeedka dadweynaha, arrimaha shaqada, sugidda ilaha dakhli iyo Raad-reebka nolosha qoyska.

Aragtiyaha xaddidan ee laga haysto QRB waxa ay abuuraysaa mushkilad faham darro oo ku saabsan nooca raadreebyada bulsho ee lagu aqoonsanayo QDB, si ka duwan raadreebyada lagu aqoonsado deraasadaha la halmaala ee kala ah qiimeynta Raad-reebka caafiimaad, qiimayanta Raad-reebka dhaqan, qimaynta Raad-reebka dhaxaltooyo, qiimaynta Raad-reebka quruxeed, ama qiimeynta Raad-reebka jinsi. Haddaba, deraasadaha QRB waxa ay hawlwadeennadu ku dersaan dhammaan arrimaha Raad-reebka ku leh dadka, si toos ah ama si aan toos ahayn.

7.2.1. Qaybaha Raad-reebka Bulshada

- Raad-reebka qaabdhismeedka bulsho, sida isbeddellada ku yimaadda bulshada ama sifooyinka kale ee bulshada, sida heerka labka ama dheddiga, celcelista da'da, heerka tirada dadka waddanka soo galaysa am aka baxaysa iyo nooca adeegyada dadweynaha ee ay bulshadu u baahan ahay natiijooyinkan awgood, sida usbitaallada, goobaha iskuullada, guriyeynta, iwm.;
- Raad-reebka khayraadka soo jireenka ah, sida isbeddelka ku yimaadda raadadkii ama aansaartii dhaqamiga ahaa iyo isbeddelka qaabdhismeedka guud ee muuqaallada deegaanka ee muhiimka u ahaa dhaqan ahaan ama diin ahaan;
- Raad-reebka dhaqan-bulsheed oo ay ka midyihiin isbeddellada ku yimaadda nidaamka bulsho, ururrada bulsho, xidhiidhadhada bulshada oo ay weheliyaan dhaqanka iyo qiyamka bulshadu, sida afka, lebbiska, diinta iyo caadooyinka kale ee dhaqamaiga ah.

Badanaa deraasaha QRDB, Raad-reebka bulshda waxa loo tixgeliyaa isbeddallada ku yimaadda qaabdhismeedka buldhada oo keli ah. Waxa ay u egtahay in la derso keliya Raad-reebkan

qaabdhismeedka bulshada, maxaa yeelay waa kuwo si fudud loo aqoonsan karo oo kow laba la odhan karo, iyada oo loo marayo daqiiqooyin la isla yaqaaan. Waa raadreebyo tiro ahaan la sugi karo, tusaale ahaam tirdada dadka dadka waddanka ka baxday iyo tirada dadka ah ee waddanka soo gadahay. Sidoo kale, tirada dad ah ee la filayo in ay qoysasku ka koobnaadaan, kuwaas oo laga qiyaas qaadan karo laguna oddorosi karo baaxadda isbeddelka ku imanaya qaabdhisameedka bulshada.

Aragtidan xaddidadan ee Raad-reebka bulshadu, waxa ay ka tegaysaa oo ay dayacaysaa xogo badan oo ka tiro badan kuwa ay soo bandhigayso ama dersayso.

Qaybta ugu muhiimsan ee ay deraasaddani dayacday "dhanka-bulsheed" oo ah qaybta ugu habboon ee koobsan karta micnaha derasaadda ayaa inta badan indhaha laga laliyaa. Sabata ugu weyn looga tagaana waa in aanay jirin habraacyo la isla yaqaanno oo la sahamin karo Raad-reebkan bulsho iyo sida ay mashaariciida kala duwan ee laga fuliyo goobo kala duwani u waxyeellaynayaan. Raad-reebka dhan-bulsheed waa isbeddellada ku yimaadda xidhiidhka u dhexeeya xubnaha bulshada iyo hay'adaha bulshada, kaas oo salka ku haya saamayn dibadeed. Si kastaba ha ahaatee, Raad-reebka bulshada waxa ka mid ah isbeddlada qaabnololeedka ku yimaadda, sida:

- Tayada nolosha
- Ururrada bulshada iyo qaabdhismeedkooda
- Dhaqanka, sida afka, caadooyinka bulshada iyo sida guud ee ay bulshadu u nooshahay. Waa sifo ka mid ah sifooyinka ay kooxaha bulshadu kaga soocan yihiin kooxaha kale.
- Laamaha siyaasadda iyo hannaanka xallinta khilaafaadka
- Xidhiidhka faceed iyo qiyamka

Waxa jira laba arrimood oo farsamo ahaan iyo aragti ahaanba ku sidkan Raad-reebka bulsho marka la samaynayo dersaadaha QRDB.

1. Waxa suurtagal ah in busldha ku dhaqan dhulka miyiyda ah ama tuulooyinku ay u deegaan si qabaa'il ah. Aaad bay qabii'iladu u kala duwan yihiin uguna xooggan yihiin wadddamada soo koroya, marka la barbardhigo waddama wershadaha yeeshay. Sidaas awgeed, arrintaniw axa ay gogoldhig u noqon kartaa in la sahamiyo Raad-reebka. Waa arrin si toos ah xidhiidh u la leh dadka iyo sida ay deegaanka ugu kala nool yihiin. Tusaale ahaan, mashruuc laga fulinayo deegaan miyi ah ayaa horseedi kara in ay dad badan oo meelo kale ka soo guuray soo degaan deegaanka mashruuca laga fuliyey oo ay suurtagal tahay in markii hore aanay dad aad u tiro

badani ku noolayn. Waxa hubaal ah in amshruucaasi uu kordhinayo tiradii dadka ee goobta mashruuca laga fuliyey, sidoo kale raadreeb xun oo aan loo baahnaynna uu ku reebayo deegaanka, haddii aan laga sii fekerin kaabayaashii nolosha ee aasaasiga ahaa, in la xilli ku habboon iyo goob ku habboon

- Intaas waxa dheer, Raad-reebka deegaanka ee tooska ahi waxa uu keeni karaa isbeddel ku yimaadda bulshda, kaas oo dib raadreeb ugu yeelan doona deegaanka. Tusaale, haddii dhirta laga xaalufiyo mid ka mida dooxooyinka Somaliland, si goobta looga fuliyo mashruuc biyaxidheen ah. Waxa hubaal ah in dadkii deegaanka iyo xoolahooduba ay ka hayaamayaan goobta una guurayaan mel cusub oo ay degaan. Hase ahaatee, goobtaas cusub waxa ay ka faa'iidaysanayaan qaar ka mid ah khayraadyadii yaallay sida xaabadii iyo dhirtii, waxaana meeshaas ku yaraanaya duurjoogtii ku noolayd. Tani waxa ay caddayn u tahay in aan markii mashruucan la fulinayey la samaynin deraasadda QRDB si dhammaystiran loo samayn ama si fiican loo dersin Raad-reebka bulsho eek a dhalan kara mashruucaas biya-xidheenka.
- Xidhiidhka dhaw ee ka dhexeeya bulshada iyo deegaanka ayaa suurtagelinya in la ogaado, la saadaaliyo, lana qiimeeyo Raad-reebka bulsho ee nolosha deegaanka guudkiisa ka jirta. Waxa habboon in la helo xeeldheerayaal bulsho oo aqoon durugsan u leh samaynta deraasadaha si ay ula shaqeeyaan kooxda samaynaysa deraasadaha Raad-reebka deegaanka samaynaysa, si ay u fahmaan nooca Raad-reebka bulsho iyo sida uu ula xidhiidho habnoleedka deegaanka. Maraka qaarkood, qiimeynta Raad-reebka bulshada waxa loo sameeyaa si ka madaxbannaan deraasadaha kale, waxaana lagu daraa warbixinta QRDB, iyada oo ah cusub iskii isu taagi kara, balse xidhiidh la leh qaybaha kale ee warbixinta. In habkan la adeegsadaa waxa ay ka wanaagsan tahay in qiimaynta Raad-reebka bulshadu ay keligeed noqoto deraasad warxin gaar ah leh.

2. Dadka deegaanka ku ah goobta laga fulinayo mashaariicda horumarintu, intu badan waxa laga yaaba in aanay ahayn ka faa'iideystayaasha mashruuca. Waxa kale oo laga yabaa in ay ku qanacsan yihiin faa'iidada yare e uu mashruucaasi u leeyahay inta uu socdo, ida shaqo abuur in ay ka helaaan wejiga dhismayaasha mashruucu ay socdaan, laakiin waa in ay diiradda la saaro Raad-reebka uu mashruucu ku reebi karo deegaanka ee laga yaabo in ay soo raagto, sida khayraadkii dabiiciga ahaa ee deegaanka oo yaraada, hawada iyo tayada biyaha oo hoos u dhac ku yimaaddo. Haddaba, waa in aan loo fahmin in gunaanadkani uu yahay mid heer caalami ah oo loo adeegsan karo meel kasta iyo mar kasta. Hase ahaatee, waa gunaanad ka soo maaxday waayo-aragnimo la xidhiidha dhacdooyin si isdadaba joog ah u dhacay. Arrimaha sinaanta lamaanuhu, waa ujeeddooyin si laxaad leh uga dhex muuqda qorshayaasha laamaha kala

duwan ee dadwladda iyo laamaha kale ee wadashaqaynta la leh. Xog la xidhiidha arrimaha deegaanka iyo sida ay bulshadu uga faa'iideyso oo ay weheliyaan qorshayaashii iyo habraacyadii lagu yaraynayey Raad-reebka tabani, waa in la gaadhsiiyo cidda ay talada mashruucu ka go'do, si loo hubiyo iyo Raad-reebka waxqabayada horumarinee uu yahay mid loo siman yahay.

- Waxa soo xoogeysanaya in derasadaha qiimeynta Raad-reebka bulshadu ay qayb ka noqdaan QRDB. QRDB waxa ka mid ah barnaamijyo wadatashi iyo dib-u-eegis. Arrintani waxa ay kooxaha iyo shaqsiyaadkaba u siinaysa fursad ay kaga qaybgalaan qoondaynta msahruuca la fulinayo, iyada oo loo marayo QRDB. Habkani waxa uu leeyahay saamayn inta badan indhaha laga laliyo. Bulshada iyo kooxuhuba waxa ay ka falcleiyaan isbeddellada ay filayaan in ay saamaynayaan dan ay leeyihiin, waxaanay qaadi karaan tallaabooyin lagaga hortagayo, lagu baajinayo ama ama lagu yaraynayo dhacdo la filayey. Hase ahaatee, noolayaasha kale iyo deegaanka dabiiciga ahi ma qaadi karaan ficillo kuwan u dhigma. Tani waxa ay u gaar tahay dadka, waxaany horeedaysaa in qoto-dheer leh loo Raad-reebka bulsho, iyada oo ay goobjoog yihiin cidda mashruuca fulinaysa iyo laamaha dawladdu, waana hab lagu dardargelinyo, laguna dhiirrigelinayo in bulshda deegaanku ay ka gaashaantaan isbeddellada suurtagal ah ee uu mashruucu keeni karo. Haddii si ku habbon loo hirgeliyo istaraatijiyaddani waxa ay horseedaysaa in mashruucii la fuliyo, iyada oo aan habsan badani ku iman, kharash badanna aan la gelin.

Hannanka loo sameeyo qimeynta Raad-reebka bulshadu waa la mid hannaanka QRDB, mar la eegayo tallaabooyinka iyo waxqabadyada aasasiga ah, sidaas awgeed in qiimeyntan lagu daro QRDB ayaa aad u fudud. Hase ahaatee, waxa jira arrimo dhawr ah oo u gaar ah qiimeynta Raad-reebka bulshada oo in tixgelin gaar ah la siiyo u baahan.

Ugu horreyn, waxa uu caqaaqibka ugu horreeyaa soo baayaa marka ay dadku ka falceliyaan mashruuca la qoondeeyay ee ay ogaadaan Raad-reebka uu ku yeelanayo haddii deegaankooda laga hirgeliyo. Waa in laga feejignaado oo la sii meeldhigo habraacyadii lagag jawaabi lahaa Raad-reebka la saadaaliyey, iyada oo lagala tashanayo dadweynaha, isla marka la soo gudbiyo qabyaqoraalka warbxinta QRDB. Dadka danaynaya iyo kuwa uu saamaynat tooska noloodha u taabanayo mashruucuba, waxa ay xogaha hordhaca ay uga falcelin karaan si raadreeb yeelan karta. Waa in ay caddahay falcelinta iyo sida looga jawaabaya, ka hor inta aan wadatashigu qabsoomin. Arrintani waa mid culayskeed leh, inta badanna laguma daro deraasadda QRDB.

Raad-reebka bulshadu, sida raadreebyada kale waxa uu u baahan yahay in la aqoonsado, la rogrogo oo la qiimeyo baaxaddiisa iyo sida uu u dhci karo. Way fududahay in la isku haleeyo ama lagu saadaaliyo xogaha cilmibaadhayaashu ay soo jeediyeen ama diwaannada kaysdan ee loogu talagalay in lagu cabbiro Raad-reebka. Baaxadda Raad-reebka bulsho ee kooxo ku dhici kartaa way ka duwanaan kartaa baaxadda kooxo kale ku dhici lahayd. Waa in la eego habnoleedka deegaanka iyo sida ay dadweynuhu u arkaan baaxadda Raad-reebka, hase ahaatee waa in si gaar ah ahmiyad loo siiyo baaxadda Raad-reebka dhanka bulshada.

Ugu damabyn, marka la meeleeyo qorshayaayasha maarynta Raad-reebka, oo ay qayb ka yihiin habraacyadii iyo hannakii loo kormeeri lahaa, waa in maanka lagu hayo in aan Raad-reebka qorshaha ama qoondada mashruuca uun diiradda la saarin, balse sidoo kale si dhaw loo derso bulshada ama deegaanka ay suurtagalka tahay in uu mashruucu saamayan ku reebayo. Bulshadu waxa ay qaadi karaan tallaabooyin lagu yaraynayo Raad-reebka taban ee mashruuca hadii aan meesha laga saari karin. Waxa kale oo in maanka lagu hayo istaahila, in dhammaan habraacyada la adeesanayo ee lagu yaraynayo Raad-reebka habnoleedka deegaan ee mashruucu ay leeyihiin kuwo bulshada u leh raadreeb muhiim ah. Aad bay u adag tahay in la saadaali Raad-reebka bulshadu, maxaa yeelay kala duwanaanshaha habnoleedka iyo hannaanka bulsho. Hase ahaaatee, raadreebyada soo gaadhaya qaabdhismeedka bulsho, ma aha kuwo aan la saadaalin karin. Haddaba, saadaalinta Raad-reebka bulsho way ka duwan tahay, sida aynu u saadaalinno raadreebyada saameeya habnoloeedyada deegaanka ka jira, sida dikhawga biyaha iyo hawada iyo habnoleedyada kale ee dabiiciga ah.

Marxaladda koowa, waa in la aqoonsado kooxaha bulshda ka dhex jira, maaddaama bulshda deegaanku ay ka kooban tahay kooxo bulsheed. Sifooyinka ugu muhiimsan ee ay kooxaha bulshadu wadaagaan waxa ay noqon karaan:

- Qoomiyadda/qabiilka
- Shaqada
- Xaaladda dhaqan-dhaqaale
- Da’da; iyo
- Jinsiga

Marka labaad, waa in la in la ogaado intee in le’eg ayay dadka deegaanku gacanta ku hayaan khayraadka dabiiciga ah, ama ha sifo sharci ah ha loogu aqoonsanaado ama yaan loogu aqoonsanaanine. Gacan ku haynta waxa looga jeeda in go’aanka kama dambaysta ah ee la

xidhiidha khayraadka dabiiciga ahi uu gacanta ugu jiraa bulshada, isla markaana ay awood u leeyihiin soo ssaaristiisa, qaybintiisa iyo adeegsigiisaaba. Haddaba, xidhiidhkan ka dhexeeya kooxaha bulshada iyo maamulka khayraadka dabiiciga ah waa in la gorfeeyo oo la fahmo hannankii loo adeegsan lahaa khayraadkan, khilaafkana loo xallin lahaa.

7.3. Raad-reebka Caafimaad

Waayadi hore marka la samaynayo deraasadaha QRDB, caafiimaadka aad diiradda looma saari jirin, xataa marka la samaynayo deraasadah QRB, waxa la iska indhatiri jirey raadreebyada uu mashruuca la qoondeeyay ku yeelanayo caafimaadka xuska shaqsiyaadka bulshada, waxaana loo arkayey wax aan mudnayn.

Hay'adda Caafimaadka Adduunku waxa ay caafimaadka ku qeexday "… illaa iyo heerka uu qof ama kooxi awood u leeyahay xaqiijinta himilooyinkiisa iyo haqabtirka baahiyahiisa … si uu u beddelo ama ula qabsado deegaanka ku xeeran" Waa aragti togan oo xoogga saaraysa dhanka khayraadka bulshada iyo awoodda jidheed. Caafimaadku, keliya ma aha maqnaanshaha cudurka. Sidaas awgeed, waxa aad u xooggan xidhiidhka ka dhexeeya Raad-reebka bulshada iyo caafimaadka. Inta badan, Raad-reebka caafimaadku waxa uu ku tiirsan yahay isbeddellada deegaanka ku yimaadda ee kediska, tusaal ahaan marka la beddelo degel hore loo degi jirey, waxa laga yabaa in ay ka dhashaan cudurrada biyaha ku gudba, sida kuwa ay kaneecadu keento iyo shubanka. Sidoo kale, waxa suurtagal ah, in ay kordhaan wadaxidhiidhka dadka iyo cudursidayaashu.

Xidhiidhka tooska ah ee ka dheexeeya isbeddelka deegaan nololeedka iyo dillacista cudurradu, waxa ay noqon kartaa sabab ka mid ah sababaha aan inta badan loo deraasaynin Raad-reebka caafimaad. Si kastaba ha ahaatee, waxa jira cudurro kale oo bulshada dhexdeeda ka dhalan kara, tusaale ahaan sida cudurrada galmada la isugu gudbiyo, oo inta badan la aaminsan yahay in ay ka dhalan karaan shaqaalaha wada mashaariicda waaweyn ee dhismayaasha, maaddaama ay lacagtii ay shaqaysteen ku kharashgaraynayaan dhulka miyiga ah.

Hannaanka horumarka dadna way ka faa'iidaan, dadna way ku khasaaraan. Dadka qaar ayaa laga yaaba in ay halis ugu jiraan in dikhawga iyo waskhawga ay keeni karaan mashaariicda horumarku ay raadreeb ku reebaan caafimaadkooda. Si la mid ah sidaas, dadka qaar ayay mashaariicdu ku keeni karaan hoos u dhac nololeed, haddii khayraadkii ay ku noolaayeen uu hoos u dhaco ama la waayo iyada oo aanay jirin wax kale oo loogu beddelay. Sidaas awgee, marka ay isbeddellada noocan ahi dhacaan waxa ay horseedi karaan isbeddel dhaqan-dhaqaale oo sababi kara in ay

kordhaan heerka cudurrada iyo dhimashadu, sababo la xidhiidha nafaqa-darro, saxo-xumo ama dhaqaalihii soo geli jirey ee ay caafimaadkooda ku daryeeli lahaayeen oo meesha ka baxay.

Si aad aad uga fogeyn sidan, haddii dadka laga raro deegaankii ay hore ugu noolaayeen oo loo raro deegaan kale, iyada oo ay sababtu tahay in goobtii ay deganaayeen laga fulinayo mashruuc horumarineed sida balli ama biyaxidheen. Sida horeba looga soo joogay, waxa hubaal ah in ay tirada cudurrada iyo dhimasahda ee bulshda deegaan beddelka loo sameeyay kordhayso. Waxa sidoo kale, la ogyahay in dadka waayeelka ah iyo dhallaanku ay u nugul yihiin cudurrada. Si kastaba ha ahaatee, Raad-reebka caafimaad waxa uu noqon karaa mid si toos ah ula xidhiidha horumarka, gaar ahaan arrimaha farsamo ee khatartu ku xeeran tahay sida sii daynta walxaha sumaysan ee neefta ah (sida dhacdadii Bhopal) ama qarax.

Sida deraaadaha QRDB oo kale, qiimeynta Raad-reebka caafiimaad, waa in ay marto tallaabooyinkii isku xigxigay eek u muujisnaa qaabdhismeedka deraasadaha QRDB. Marka la dejinayo xayndaabka Raad-reebka mashruuca, waa in si gaar ah diiradda loogu hayo Raad-reebka caafimaad, sidaas awgeed xeeldheeryaal ku takhasusay arrima deegaanka ama caafimaadku waa in ay qayb ka noqdaan kooxaha deraasadda QRDB. In kasta oo ay ku xidhan tahay nooca mashruuca iyo goobt laga fulinayo, waxa in laga fekero muhiim ah helitaanka xeeldheerayaal caafimad oo si gaar ah ugu kala dhuundaloola lamaha kala duwan ee caafimaadka, sida xeeldheeryaal aqoon durugsan u leh sunta, faafista cudurrada iyo cilminafsiga bulshda. Qiimeynta Raad-reebka Caafimaadku waxa ay ku xidhan tahay uun jiritaanka iyo aqoonsiga arrimo caafimaadka halis ku ah. Waxa diiradda lagu saaraa in lagu aqoonsado nooca khatar caafimaad ah ee ku gedaaman mashruuc laga fulinayo deegaan ama gobol.

Sidoo kale, waxa si gaar ah loo dersaa intee in le'eg ayuu khatar caafimaad keeni karaa mashruucu, iyada oo laga shidaal qaadanayo qodobbada deegaanka ku hareeraysan ee raadreeb ku yeelan kara caafimaadka bulshada ama kooxo gaar ah. Khataraha la sahaminyaa waxa ay noqon karaan kuwo ka soo ifbixi kara shaqada maalin laha ah ee mashruuca, qashinka aiyo hadhaadiga walxaha la adeesaday; ama dhacdo aan la filaynin. Qodobbada khataraha keeni kara ee xidhiidhka la leh mashruuca la fulinayo waxa loo kala saari karaa kiimooyin, shucaac, noolayaal ama dhacdooyin xidhiidh la leh qabdhismeedka dhuleed/duleed, sida cadaadis mawjadeed oo ka dhashay qarax ama xoqitaan dhulka hoostiisa ah.

Ugu dambayn, waxa muhiim ha in la derso awoodda goobaha caafimaadka dadweynaha ee jira si bulshada iyo shaqsiyaadkaba looga dhawro khataraha ku gedaaman. Marka la derso awoodda

goobaha caafimaadka, waxa la ogaan karaa khatarta Raad-reebka caafimaad ee soo gaadhi kara bulshada ama shaqsiyaadka. Sidoo kale, waxa la si hoose loo eegaya qodobbada sida gaarka u saamaynaya kooxaha khatarta caafimaad ay dul hoganayso, waxaana suurtagal noqonaysa in si khatarta loo yareeyo la kala doorto jidad isu dhigma iyada oo la eegayo jidkastaa saamaynta uu leeyahay. Haddaba, in jidadkan isbarbardhig lagu sameeyaa waxa ay muhiim u tahay in la ogaado jid kasta iyo inta uu raadreebkiisa caafimaad le'eg yahay. Nasiib-darro, isu miisaamidda jidadku kuma habboona cudurrada faafa, nafaqo-darrada iyo dhaawacyada jidhedh. Khataraha mar la aragga ah ee aan soo noqnonin, waa in la qiyaaso iyada oo la adeegsanayo ihtimaalka gorfeynta khataragha, si loo ogaado suurtagalnimada ay khatartu ku dhici karto.

7.4. Raad-reebka Dhaqaale

Sababii kalifay in Raad-reebka bulshada lagu daro QRDB, ayaa sidoo kale keenay in deraasadha qiimeynt Raad-reebka dhaqaalena uu qayb ka noqdo QRDB. Shaki kuma jiro in isbeddelka ku yimaadda dhaqaalahaha deegaan gaar ahi uu si toos ah u taabanayo nolsohda bulsdha deegaanka iyo shaqsiyaadkaba. Deraasadda Qiimeynta Raad-reebka Dhaqaale waxa ay diiradda saarayasaa oo ay qiyaasaysaa isbeddellada ku yimaadda jeebka qofka iyo heerarka kala duwan ee arrimaha ganacsiyada.

Baaxadda Raad-reebka dhaqaale waxa ay ku tiistan qodobbadan soo socda:

- Muddada uu dhismuhu soconayo ama la shaqaynayo
- Cududda shaqaale ee loo bahan yahay inta u wejiga dhismaha mashruucu socdo
- Xirfadaha loo baahan yahay (haddii ay ka jiraan deegaanka)
- Gunooyinka/ dhakhliga laga shaqaysanayo
- Qalabka iyo alaabta kale ee la soo iibsanayo/ walxaha kale ee qaydhiin ee deegaanka laga isticmaalayo
- Lacagta lagu maalgelinayo
- Maxsuulka la filayo, iyo sida uu u saamaynayo dhaqaalaha deegaanka

Marka mashruuc cusub la fulinayo, waxa muhiim ah in la ogaado xogo ku saaban heerka shaqaalaysiinta, kharashaadka loo asteeyay shaqaalaha iyo soo iibsiga agabka kale ee mashruucu uga baahan yahay bulshada deegaanka. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in la sameeyo deraasadda sahanqaadka mashruuca, si looogaado suuqa shaqo iyo dhaqaale ee bulshada ugu jira mashruuca. Iyada oo la adeegsanayo deerasahan waxa la saadalin karaa Raad-reebka dhaqaale ee mashruuca.

Waxa habboon in la helo faahfaahsan oo ku saabsan xaddiga shaqaale ee uu u baahan yahay mashruucu, tusaale ahaan intee in le'eg oo xirfadlayaal ah ayuu mashruucu u baahan yahay sida, maamul, injineerro, hawlwadeenno, shaqaalihii dhiska iwm. Intaas waxa dheer, waa in la caddeeyo saamiga da'da, dhakhliga iyo muddada ay shaqaynayaa dhammaan shaqaalaha mashruuca loo qoondeeyey.

Waayo-aragnimada la xidhiidha Raad-reebka dhaqaale ee ay ka tageen mashaariicdii hore loo fulyey waxa ay muujinaysaa in laamaha horumarinta ay buunbuuniyaan tirada dadka uu mashruucu shaqo abuurka u samaynayo iyo shaqaalaha loo baahan yahay.

Way adag tahay in la gaadho xaqiiqada ku saabsan arrintani, sababta oo ah hubanti la'aanta soo jireenka iyo isbeddellada teknoolajiyada oo is kaashaday ayaan saamaxayn in ay dhacdo hore looga ilduufay mar dambe dhacdo. Si kastaba ha ahaatee, waa in la isku dayo in la sameeyo deraasaddo lagu ogaanayo cududda shaqaale ee loo baahan yahay iyo muddada loo baahan yahay. Tusaale ahaa, tirade shaqaalaha dhisamahu, xilliyada uu mashruucu badhtanka marayo way korodhaa, halka ay hoos u dhacdo marba ka sii dambaysa.

In la ogaado tirada cududda shaqaaluhu, waxa ay muhiim u tahay saadalinta kharashaadka ay shaqalaaha iyo cidda mashruuca fulinaysa wax kaga iibsanayaan suuqyada iyo agabka laga soo saaray deegaanka, inta uu mashruucu socdo. Si xogaha nocan ah loo helo waa in la sameeyo deraasad suuq oo lagu dersayo suuqyada deegaanka.

Xogtu waa inay la xidhiidhaa, ugu horrayn, suuqayada shaqada ee deegaanka. Guud ahaan, suuqyada shaqada ee deegaanka waxa lagu qeexaa qaabka uu qof deeganka ahi ugu socdaalayo goob kale oo deegaanka ah si uu uga soo shaqaysto. Qeexidda saxda ah ee suuqyada shaqada deegaanku aad bay u adag yahay, waanay kala duwunaan kartaa, iyada oo hadba ku xidhan xaaladda. Ugu horreyn, waa in la baadho qaab-dhismeedka wadaagayaasha shaqo ee deegaanka ka jira. Baadhistan waa in lagu daro intee in le'eg ayuu shaqo-abuurka deegaan gaar ahi ku xidhan yahay wadaage gaar ah, tusaale ahaan wershadaynta cuntada. Xogta la xidhiidha wadaagayaasha shaqa-abuurka waa in mudda dheer la ururiyo si loo ogaado wadaagayasha kobcay ama kuwa hoos u dhacay. Intaas waxa dheer, sida uu shaqeeyaan suuqyada shaqo ee deegaanku waa in la ogaadho, si loo caddeeyo tirade shaqaalaha ee xifad gaar ah leh, fursadahah shaqo eek a bannaan, tusaale ahaan xirfadaha alxanka ama laxaamadda,, iyo celceliska dakhliga ama gunnooyinka soo gala koox kasta oo shaqaale ah. Sidoo kale, waxa aad u muhiim ah in la ururiyo xogta dadka aan shaqaynin, hadday tahay tiradooda, da'dooda iyo xirfadahoodaba. Xogtani aad ayay muhiim u

tahay, maxaa yeelay waxa ay fusad siinaysaa in dadka shaqynin looga faa'iideeyo mashruuca. Haddii uu qofka aan shaqynin yahay qof waayeel ah, waxa laga yaaba in aanu doorbidin shaqooyinka saacadaha badan la shaqaynayo ee xoogga u baahan. Ugu dambayn, aa in baadhis lagu sameeyo heerarka labka iyo dheddiggaba ee shaqo-joogto ah ku jira, waxaana loo adeegsan karaa bartilmaameed laga qiyaas qaato. Marka la helo xog la xidhiidha shaqaalaha mashruucu u baahan yahay iyo suuqyada shaqada, waxa la saadaalin karaa Raad-reebka shaqaale ee mashruuca. Waxa jira xeelado iyo habraacyo lagu saadaaliyo Raad-reebka dhaqaale, laakiin midda ugu caansani waa isku dhufashada dakhliga iyo shaqada. Waxa ay xeeladdani ku salaysan tahay dakhliga dhiigjoojinta ah ee ugu horreeya ee suuqa soo galaya ama dhaqaalaha deegaan gaar ah ku soo biiraya. Dakhliga ugu horreeyaa waa mushaharka sida tooska ah ay u qaadanayaan shaqaalaha mashruuca wadaa iyo dakhliga kale ee agabka mashruucu u baahan yahay lagaga iibsanayo bulshda degaanka. Dakhligan dhiigjoojinta ah waxa wehilya dakhliyo kale oo soo gelaya bulshada deegaanka ama ahaadaan kharashaadka ay deegaanka ku kharashgaraynayaan dadka ay lacagahan hordhaca ahi soo galaan ama sifo kale. Dadkii soo saaray adeeegga ama agabka lagu kala iibsanayo suuqyada deegaanka, faa'iido weyn ayaa ugu jirta. Haddaba, marka uu hannankan kala macaashku in muddo ah toos u socdo, ugu damabyn waxa uu raadreeb ku yeelanayaa dhaqaalaha gudaha. Haddba, dhaqaale korka intiisa badani, waxa uu salka ku hayaa oo u si toos ah ula kordhaa haynta bulshda deegaanka, waxsoosaarka ama dhaqaale kale oo qoysaska ka soo galay qaraabadooda dalka dibeddiisa joogta. Haddaba, haddii uu kordho kharaashadka lagu isticmaalayo waxsoosaarka dadka deegaanku, waxa kordhaya dakhliga iyo shaqa-abuurka deegaanka. Mar kasta oo shaqa-abuurka iyo dakhliga bulshada deegaanku kordhana waxa si toos ah u kordhaya dhaqaalaha gudaha.

Waxa muhiim ah in la ogaado in ay jiraan qodobbo tiro badan oo go'aamiya nooca Raad-reebka dhaqaale ee uu yeelanyo mashruuc gaar ahi (shaqo-abuurka). Waxa sidoo kale la ogyhay in sifooyinka ay leeyihiin dadka aan shaqada haynin sida da'da ama xirfaddu, ay go'aaminayaan in ay ka faa'iideystaan fursadaha shaqo. Sidoo kale, in lagu go'aan qaato jaantusyada muujinaya heerka shaqaale ee kayd ahi, waxa noqonaysaa xog aan rasmi ahayn. Sidoo kale, qodobbo kale ee qadan-dhaqaale ayaa saamaynaya ragga ana haweenka doonaya in ay ka shaqo galaan wadaage gaar ah. Tusaale ahaan, ragga ka soo shaqeeyay dhawr shaqo oo kala duwan, waxa laga yaabaa in waayo-aragnimadoodii hore awgeed, aanay doonaynin in ay waajahan khatarta ay leedahay in hal shaqo ay u go'aan. Waxay horseedi karaan inay faafiyaan ra'yigooda la xidhiidha khatarta ay

leedahay in hal shaqo oo aan rasmi ahayn loo go'aa. Raad-reebka ay mashaariicdu ku yeelayanaan wadaagayaasha shaqo ee soo jireenka ahi, waxa laga yaabaa in uu noqdo mid halis badan. Waxa badan suurtagalnimada ay shaqaalaha ka duufsan karaan wadaagayaashii soo jireenka ahaa. Intaas waxa dheer, suurtagalnimada ay ku dhici karto arrintani waxa ay ku xidhan tahay:

In wadaagayaasha kale ee suuqa jira ay shaqaalahoodu uga tagaan sabab la xidhiidh doorbidista mashaariicda dhisme ee socda, haddaba, marka uu mashrucu dhammaystirmo shaqaalihii dib ma u heli doonaan shaqadoodii hore? Waa in la derso Raad-reebka mashruucu uu ku yeelanayo wadaagayaasha kale, waana arrin aan fududayn. Waxa laga yabaa in tartanka suuqa shaqaale ee u dhexeeya wadaagayashu uu dhaqaale ahaan wanaagsan yahay, balse haddii wadaagayaasha qaarkood ay yihiin kuwo dhaqami ah, tusaale ahaan qabiil ama qarannimo ku aasaasan, khasaare baaxad leh ayaa soo gaadhaya. Raad-reebka dhaqaale ee mashaariicdu waxa uu noqonayaa midka sababaya Raad-reebka bulsho. Arrintan waxa si toos ah loo dareemi karaa haddii mashruuc dhisme uu sababo in dad deegaanno kale oo goobta mashruuca lafa fulinayo ka baxsani ay ka shaqo galaan. Inta badani, ma dhacdo dhacdadan oo kale, waxa ay ku xidhan tahay suuqa shaqo eek a jira deegaanka iyo nooca xirfadood ee ay leeyihiin, isla markaana mashruucu u baahan yahay. Waddamo badan oo kuwa soo koraya ah, sida Somaliland waa arrimahan tixegelin gar ah la siiyo. Mashariicda baaxaddoodu wayn tahay waxa ay u dhigmaan sidii jasiirado barwaaqosooran ah oo ku dhexyaalla badaweynta saboolnimda. Sidaas awgeed, mashaariicdu waxa ay soo jiidan karaan dadka doonaya in ay ka fursado shaqo ama mid kale oo waxbarasho ama caafimaadba ka helaan mashaariicda cusub. Haddaba, marka ay jiraan duruufahani waxa kordhi kara wadarata dadka ee goobta ama deegaanka mashruuca laga fulinayo ku sugan, iyada oo ay sababtu tahay filashooyinkaas. Dadkani waxa ay culays xad-dhaaf ah saarayaan kaabayaashii dhaqaale, deegaanka iyo adeegyada aasaasiga ah ee ay dawladaha hoose bixiyaan.

LIFAAQ A: Jaantuska QRDB



Lifaaq B: Diiwaanka Dib-u-eegista Raad-reebka Deegaanka

	Mashruuca la qoondeeyay raadreeb ma ku yeelaan doonaa deegaanka?															
Dooro midda ku habboon	**Dhaqan-dhaqaale**			**Bilcda/Dhaqanka**			**Noole-ahaan**				**Dabiici**					
Heerka Mashruuca iyo Waxqabayada La Xidhiidha	**Dhakhli**	**Shaqada**	**Barakac**	**Dhul gaar ah**	**Waxa door bidaya Dadka deegaanku**	**Jinsi**	**Goobaha dhaqanka**	**Dhirta**	**Xayawaanka**	**Dadka**	**Deegaannada lama taabtaanka ah**	**Biyaha**	**Dhulka**	**Hawada**	**Sawaxan**	**Waxkale**
1. Doorshada goobta iyo diyaarinteeda																
Nooca waxqabadka																
Nooca goobta																
Waxqabka u dhigma ama lagu soorsan karo																
Goobta u dhiganta goobta																
Other																
2. Diyaarinta goobta iyo wejiga dhismaha ee mshruuca																
Nadiifinta goobta																
Qodista																
Jidadka																
Raridda qalabka la																

adeegsanayo																
Maaraynta qashinka																
Dib u cusboonaysiin																
Wax kale																
3. Wejiga hirgelinta iyo hawlgalinya ee mashruuca																
Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada																
Hawlgelinta qalabka																
Tamarta loo baahan yahay																
Biyaha loo baahan yahay																
Maarynta qashinka																
Liigitaanka walxaha																
Dikhaw																
Wax kale, tusaale ahaan waxsoosaar																
3. Mustaqblaka iyo waxqabadyada kale ee la xidhiidha																
Sababaha korriinka																

Dadka																
Guurguurka dadka																
Tamarta loo baahan yahay																
Saamaynta loo baahan yahay																
Wax kale																

Xusuusin: Warbixinta habraacyada la aqoonsaday ee lagu yaraynayo Raad-reebka taban, waan in lagu soo lifaaqo.

Lifaaq C: Diiwaanka Faahfaahsan Ee Aqoonsiga Raad-reebka Deegaanka

Diiwaankan soo socda, waxa loogu talagalay in lagu aqoonsado in uu mashruuc, siyaasad ama barnaamij la qoondeeyay uu raadreeb laxaad leh ku yeelanayo deegaanka.

1. Ciwaanka mashruuca
2. Laanta fulinaysa iyo ciwaankeeda
3. Cidda mashruuca maalgelinaysa iyo ciwaankeeda
4. Goobta mashruuca loo qoondeeyay
5. Faahfaahin la xidhiidha mashruuca (sharrax dhammaan waxqabadayada mashruuca ku lamaan, sida tallaabooyinka waxqabad ee la qaadayao wejiyada kala duwan ee mashruuca iyo dhammaan arrimaha kale ee loo arko in ay muhiiim u yihiin mashruuca eek u saabsan goobta laga laga fulinayo mashruuca. Haddii laga maarmi waayo xaashiyo kale oo dheeraad ah oo aad ku faahfaahisay xogahan aasaasiga ah)
6. Faahfaahin ku saasan goobta mashruuca loo qoondeeyay iyo goobaha ku xeeran.

Arrimaha Deegaanka La Xidhiidha ee Ay Saamaynta Laxaadka Lihi Soo Gaadhayso

Shaxankan hoose waxa ku muujisan arrimaha deegaanka la xidhiidha ee uu mashruucu saamaynta laxaadka leh ku reebi karo, waxaana xaashiyaha ku sii xiga ku xusan

Dhul-ahaan	Tayada hawada	Waxyeellada iyo khataraha
Khayraadka nool	Sawaxan	Goobaha madaddaalada
Bilicda	Adeegyada bulshada	Waxqabyada kale ee dhaqaale
Tayada biyaha/ soo saaritaankooda	Adeegyada iyo ka faa'iideysigooda	Raadreeb togan
Qorshaynta isticmaalka dhulka	Tamarta	Gaadiidka iyo isu-socodka
Dadka iyo guriyeynta	Caadimaadka guud iyo bedqabka	Khayradka dhaqamiga ah

diiwaan la calaamadinayo meeshii ku habboon.

Calaamad ku muuji meesha ku habboon (Dhammaan jawaabuhu waa in ay ka turjumayaan tallaabooyinka la qaadayo, oo ay ku jiraan goobta iyo meelaha ka baxsaniba, sidoo kale waa in waa in la xuso waxqabadyada dadban iyo kuwa muuqda ee la halmaala mashruuca; iyo dhismaha ama Raad-reebka shaqada mashruuca).

Dhul ahaan

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Ku keeni dadka, dhismayaasha iyo hantida kaleba khataro dabiici ah sida dhul-gariir, dhuldillac, dhaqaxaan soo dhaca (qardun) ama burbur dhuleed		
Horseedi kara in xaalado dhulka khalkhalgelin kara ama isbeddel ku yimaadda qaybaha dhulka		
Horseedi kara khalkhal, barakac ama cufnaan dad oo keenaysa in ay dadku ku bataan meel gaar ah		
Horseedi kara isbeddel ku yimaadda kalasarraynta dhulka iyo muuqaallada dabiiciga ah		
Burburin, daboolid ama beddelid qaabdhismeed gaar ah oo dhuleed ama muuqaallada dabiicda ah ee dhulka		
Goobta ama agagarkeeda ku kordhin kara carra-guurka ay sababaan daybsha ama biyuhu,		
Keeni karta isbeddel ama carro-guur ku yimaadda qulqulka biyaha marinbiyoodyada berriga ama goob kale oo biyihu ku negaadaan sida harooyinka.		
Ku ku yaalla goob goob kala dhantaalan ama meel ku sifaysan in ay kala qaaran tahay.	____	

Dhadhaab dhuleed oo ay ku jiraan walxo dareere ahaan ah, ama keeni kara gariir sababi kara dhacdooyinka dhulka lula	____	____
Soo badngigi karo khatar, sida dhul-dillac ku yimaadda meelaha janjeedha	____	____
Ku yaalla meel ciid leh oo laga yaabo in ay dunto, tusaal ahaan meelaha macdanta laga qodo ama dhu kale ooo biyaha dhulka hoostiisu ay huleen ama qodeen.	____	____
Soo faqid ciideed oo keeni karta in dhaawac ku yimaaddo sees ama qaabdhismeed kale	____	____
Ku yaalla meel loogu talagalay dhul beereed	____	____

Khayraadka Nool

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Keeni karta in hoos u dhac ku yimaadda nolosha duurjoogta iyo kalluunka	____	____
Khatar ku ah ama dabarjari kara dhirta ama noolayaasha deegaanka ah	____	____
Si la xaad leh u saamaynaya noocyada noolayaasha gabaabsiga ah ama khatarta ugu jira in ay dabar-go'aan dhir iyo xayawaanba, ama degelladii ay ku noolaayeen.	____	____
Si laxaad leh u yarayn kara kalluunkii, dhirtii ama duurjoogtii deegaanka ahayd	____	____
Si laxaad leh u farogelin kara ama sababi kara hayaa iyo guurguur ku yimaadda kalluunkii iyo duurjoogtii deegaanka ahayd ama nooleyaal kaleba	____	____
Beddeli kara kala-duwanaanshaha iyo isku-dhafnida ama tirada noolayaasha kala duwan sida noocyada dhirta (dhirta jirrida adag leh, geedgaabka iyo dhrta biyaha ka dhex baxda) ama xayawaanka sida (shinbiraha, laf-dhabarlayda, kalluunka, alaalaxayda badda, caarooyinka badda ama cayayaanka kale).	____	____

Keeni kara noocyo cusub oo dhireed ama xayawaan ama caqabad ku noqon kara taranka noocyadii noolayaasha hore ee sii jirey.	____	____
Sababi kara in uu yaraado dhulbeereedkii midhaha lagu beeeri jirey.	____	____
Kordhin kara heerka isticmaalka khayraadka dabiiciga ah	____	____
Hoos u dhigi kara ama khalkhalgelin kara degsiimooyinka kalluunka iyo duurjoogta hada jirta.	____	____
Si daran u waxyeellayn kara dhulkii u wanaagsanaa duurjoogtaa ee noolaanshaheeda caawinayey.	____	____

Tayada Muuqaallada Dabiiciga ah Iyo Bilicda

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Leh waxyeello muuqata oo bilicda dhaawacaysa	____	____
Sababi kara burbur ku yimaadda bilicda goob ay dadweynaha indhahoodu qabanayaan ama horseedaya goob indhaha u daran	____	____
U hogaansan hagayashaasha maxaliga ah ee la xidhiidha tayada muuqaallada dabiiciga ah	____	____
Si laxaad leh u beddeli kara billicda muuqaallada dhulka	____	____
Si laxaad leh u beddeli kara tayada muuqaallada dabiicga ah ee gobol uu leeyahay ama tirtiri kara muqaallo dabiici ah. Si laxaad leh u kordhin kara widhwidhka iyo iftiinka agagaarka mashruuca.	____	____
Cadceedda ka yaraynaya ama hadoodil iyo hadh ku keenaya goobaha ay dadweynuhu aad ka ugu xidhan yihiin ama u isticmaalaan	____	____

Tayada Biyaha Iyo Ka Faa'iideysigooda

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Si ba'an hoos ugu dhigi kara tayada biyaha	____	____
Dhikhayn kara/ wasakhayn kara biyaha dadweyanaha ka dhexeeya	____	____
Si ba'an u yarayn kara ama u gudhin kara biyaha dhulka hoostiisa ku jira	____	____
Farogelin ku yeellan kara soo maaxidda biyaha dhulka hoostiisa	____	____
Sababi kara fatahaad laxaad leh, carro-guur ama wasakhaw biyood (dhiiqo)	____	____
Sababi kara isbeddel ku yimaadda jihadii ay biyuhu u socdeen	____	____
Sababi kara isbeddel ku yimaadda heerka qulqulka biyaha, biyamareennada ama biyaha dhulka guukiisa yaallaa in ay gudhaan.	____	____
Bddeli kara qulqulka biyaha daadka ah	____	____
Beddeli kara xaddiga biyaha eek u jira biyaqabatinnada kala duwan ee dhulka guudkiisa	____	____
Siiddayn kara biyaha dhulka guudkiisa ama sababi kara isbeddel ku yimaadda tayada biyaha dhulka guudkiisa, sida in heerkoodu isbeddeli ama xaddigii ogsajiinta ee biyaha ku jirey uu yaraado.	____	____
Beddeli kara jihada ay u qulqulaan biyaha dhulka guudkiisu	____	____
Cause change in the quantity of ground waters, either through direct additions or withdrawals. Sabai kara isbeddel ku yimaadda guu dahaan tayada biyaha dhuka guudkiisa, tusaale ahaan ay wax ku kordhaan ama wax ka dhacaan.	____	____
Si laxaad leh u yarayn kara biyihii ay heli jireen dadweynuhu.	____	____
U horssedi kara bulshada iyo hantidoobada khatar biyaha ka dhalatay sida fatahaad.	____	____
Faragelin ku yeellan kara adeegyo kale ama goobo kale oo ku yaalla meelo u nugul fatahaadda	____	____

Kordhin kara Raad-reebka ay yeelanayaan adeegyo ama waxqabadyo kale, kuna keeni kara fatahaad goobta ka baxsan, carro-guur ama dhaqaxaan xidha marin biyood.	____	____

Ka Faa'iideysiga Dhulka

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
In qorshayaasha deegaanku ay ka hor imanayaan yoolasha ay leeedaha bulshda deegaanku	____	____
Qaybqaybin kara ama khlkhalgelin kara isku-duubnida bulshada deegaanka	____	____
Ka hor imayana goobihii madadddaalada, waxbarasha, diinta ama cilmiga eek a jirey goobta	____	____
Convert prime agricultural land to non-agricultural use, or impair the agricultural productivity of prime agricultural land. U beddelayaa dhulkii beerashada u wanaagsanaa meel aan waxba laga beeran, ama curyaaminaya waxsoosaarkii beeraha dhulbeereed aad u muhiim ahaa	____	____
Ka hor imanaya siyaadaha ka faa'iideysiga dhulka	____	____
Sababi kara isbeddel ku yimaadda dhul laga faa'iideysto ama la qorsheyay.	____	____
Sababi kara in dhul bannaani uu noqdo magaalo ama badh-magaaloobo	____	____
Isdiiddooyinka qorshayaash guud, qorshayaasha bulshada iyo qorshaynta aagga.	____	____

Dadka, Guriyeynta Iyo Shaqo-Abuurta

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
In mashruucu uu soo jiito dad badan oo khatar ku keeni kara goobta	____	____
Horseedi kara kor ukac laxaad leh oo tirade dadka eek u nool goob cayiman ku yimaadda.	____	____
Baracikin kara dad aad u tiro badan	____	____
Sababi kara isbeddel ku yimaadda goobta, cufnaanta iyo tirada dadka ku nool goob gaar ah	____	____
Saamayn kara degsiimooyinkii jirey ama sababi kara in loo baahdo degsiimooyin cusub	____	____
Isdiiddooyinka degsiimooyinka, saadaalinta korodhka dadka iyo siyaasadaha ama qorshayaasha guur ee la meeleeyay.	____	____

Gaadiidka Iyo isu-Socodka

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Keeni kara in uu kordho jidxidhanku/saxmadda waddooyinku oo xidhiid la leh culeyska fuuley ama ka baaxad weyn jidadka, kaas oo hakad gelin kara isu-socodka	____	____
Si laxaad leh u kordhin kara socsocodka gaadiidka	____	____
Saamayn kara goobihi waddada hareerteeda ee la dhigan jirey baabuurta (baarkin) ama sababi kara in loo baahdo goobo cusub oo baabuurta la dhigto.	____	____
Si laxaad leh u saamayn kara hannaanka isu-socdka iyo gaadiidka	____	____
Keeni kara isbeddel ku yimaadda isu-socdka dadka iyo alaabaha	____	____

Keeni kara isbeddel ku yimaadda marinnada badda, jidadka tareennada iyo kuwa hawada	____	____
Kordhin kara dhibaatada saxmadda ee gaadiidka, mootooyinka iyo baaskiiladaha	____	____
Si laxaad leh u saamayn kara adeegyada isku-xidhan ama tayadooda wax-ka-dhimi kara	____	____
Aan goobta mashruuca looga heli karin baarkin ku filam sidaas awgeedna jidxidhan ama saxmad ku keeni keeni kara goobaha u dhaw mashruuca ee jaarka la ah.	____	____

Tayada Hawada

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Waxyeellaynaya aa wax u dhimaya tayada hawada ee ay bulshadu la falgasho	____	____
Keeni kara oo soo deyn kara naqas baaxad leh oo xumayanaya tayada hawooyinka ay bulshadu la falgasho	____	____
Keeni kara ur aan loo dulqaadan karin oo daran	____	____
Keeni kara guurguur hawo, qoyaan, isbeddel heerkul ama sababi kara isbeddel cimilo oo ku yimaadda gobolka ama deegaanka.	____	____
Naqash sun ah oo la soo daayo, isla markaana ka baxsan heerka Dhikhawga Hawada ee La Maarayn Karo, isla markaana leh halis caafimaad	____	____
Xaddidi kara aragga (sida ceeryaanta)	____	____

Sawaxan/ Buuq

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Si ba'an u kordhin kara xeerka sawaxanka ee goobaha ku dhaw		
Keeni kara in nulshdu maqasho sawaxan ama qaylo ba'an	____	____

Soo saari kara sawaxan ama buuq aanay u dulqaadan karin dadka deegaanku	____	____
Horseedi karta in dhulka looga faa'iidesyto hab kordhinaysa sawaxanka goobta	____	____

Adeegyada Dadweynaha

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Saamayn kara tayada iyo tirada adeegyada, sida goobaha madaddaalada	____	____
U baahan in in shuruuc kale oo lagu dabbaqo, sida shaqaalaha iyo qalabka, si la adeeggu u noqdo mid la adeegsan karo.	____	____
U baahan in si adag shaqaalaha iyo qalabkaba dadka looga ilaaliyo dabka, si adeeggu u noqdo mid la aqbali karo.	____	____
U baahan in la kordhiyo hannaankii dugsi ee jirey	____	____
Si laxaad leh u saamayn kara goob nasasho ama u baahan kara qaabayn goob nasasho, si looga dhigo mid bulshadu aqbali karto oo leh meeqaamka goobaaha nashada.	____	____

Adeegyada Aasaasiga Ah

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Ku xadgubaya habraacyada jira ee loo maareeyo qashinka adage e waddanka ama deegaanka		
U baahan in la kordhiyo awoodda bullaacadaha ama awoodda dhuumaha dhulka hoosiisa mara	____	____
Result in a need for new systems, or substantial alterations to the following utilities: Keeni kara in hannaan cusub loo baahdo ama si laxaad leh isbeddel ugu keeni karo	____	____

adeegyadan soo socda:		
1. Korontada ama gaaska dabiiciga ah 2. Hannaanada wadaxidhiidhka iyo is-gaadsiinta 3. Biyaha 4. Bullaacadaha iyo weelka qashinka 5. Kordhin kara biyashubka 6. Maaraynta xashiishka iyo qashinka adag		
Keeni kara in ay si laaxad leh u kordhaan heerka biyaha la naiifta ah ee la cabbaa	____	____
U baahan in si laxaad leh loo ballaadhiyo hannaanka biyo qaybinta, daweynta iyo awoodda biyo-qaybinta.	____	____
U baahan in qashin-qub laxaad leh	____	____
Soo saaraya qashin adag oo ka baxsan awoodda goobaha qashinka lagu maareeyo	____	____

Tamarta

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Keeni kara waxyeello laxaad le oo aan ka soo kabasho lahayn, isla markaana soo gaadha deegaanka. Tusaale ahaan, in si laxaad leh loo isticmaalo khayraadka aan dib loo cusboonaysiin karin oo la adeegsado xilliga uu mashruucu bilowga yahay ama socdo.	____	____
Keeni kara saamayn laxaad leh oo soo gaadha hannaanka isticmaalka tamarta ee deegaanka ama gobolka; ama in loo baahdo tamar awood siyaada ah leh.	____	____
Keeni kara baahi koronto oo laxaad leh, bilowga ama badhtama mashruuca, sidaas awgeedna saamaynteeda leh. Sidoo kale, in loo baahdo nooc kale oo tamareed.	____	____

Liddi ku ah meeqaamka tamareed ee jira	____	____
Sababi kara saamayn laxaad leh oo soo gaadha khayraadyada tamarta dhaliya.	____	____
Horseedi kara tallaabooyin kordhinaya in si laxaad leh loo isticmaalo shidaalka, biyaha ama tamarta	____	____
SI laxaad leh u kordhin kara baahida loo qabo ilaha tamarta ee jira ama sababi kara in la sameeyo ilo tamareed oo cusub.	____	____

Caafimaadka Guud Iyo Bedqabka

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Goobta u soo jiidaya dad badan oo khatar kala kulmi kara	____	____
Sababi kara halis caafimaad oo laxaad leh (sida xanuunnada dhimirku), ama soo saaridda ama daadinta walxo khatar ku keeni kara dadka, xayawaanka ama dhirta goobta ku taalla.	____	____
Sababi kara sii daynta walxo halis ah oo ay ka mid yihiin saliidda, sunta cayayaanka, kiimikooyink iyo shucaac. Ha ahaato arrin si keddis ah u dhacday ama mid ka dhalatay khalkhal kale oo jira.	____	____
Ku keeni kara ama dadka u horseedi karta halis caafimaad oo xooggan.	____	____
Horseedi karta waxyeello soo gaadha caafimaadka guud iyo bedqabka oo ka dhalatay sii daynta walxo sun ah	____	____
Sababi karta waxyeello ka dhan ah bedqabka shaqaalaha, dadka goobta deggan iyo goobaha ka ag dhaw.	____	____
U hoggaansan dhammaan xeerarka iyo shuruucda u yaalla maraynta khataraha walxaha qashinka ah.	____	____

Guud Ahaan

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Si weyn hoos ugu dhigi karta tayada deegaanka	____	____
Keeni karta in la gaadho hadaf dhaw oo deegaan, lana dayaco hadafka mustqabalka deegaanka	____	____
Sababi kara raadreebyo isbiirbiirsaday oo keeni kara raadreeb weyn, balse aanu midna iskii raadreeb ba'an u noqonayn, tusaale ahaan Raad-reebka aan la dhaaddanayn ee ay leeyihiin mashaariic hore, mashaariicda hadda la fulinayo iyo kuwa la fulin doono.		
Ku keeni kara dadka, saamayn xun, si toos ah ama si dadban.	____	____

Dhaqanka

Waxqabadka la qoondeeyay	**A** Wuxuu yeelanayaa raadreeb laxaad leh, illaa la yareeyo	**B** Ma ba'na raadbeekiisu
Khalkhalgelin kara ama burburin kara khayraadka la xidhiidha dhacdooyinka loo aqoonsan yahay in door muhiim ah ku leeyihiin taariikhda Somaliland.	____	____
Carqaladayn kara ama burburin kara raadadka taarikhiga ah ee loo aqoonsan yahay in ay soo jireenka yihiin.	____	____
Khalkhalgelin kara ama burburin kara raadadka taariikh ah ee bixinaya macluumaad ay danaynayaa dadweynuhu ama muhiim u ah in laga jawaabi su'aalaha cilmiga ah ee la xidhiidha raadadka taariikhiga ah iyo jirtadii hore.	____	____
Khalkhalgelin kara ama burburin kara raadadka ama aasaarta taariikhiga ah ee ku sifaysan in ay yihiin kuwa ugu da'da weyn, ugu baaxadda weyn, tusaalah uu muhiimsan loo soo qaadan karo,	____	____

ama noocoodii kasii jooga.		
Khalkhalgelin kara ama burburin kara walxaha hadhaadiga ah ee dadkii hore.	____	____
Khalkhalgelin, beddeli kara ama burburin kara aasaar diini ah ama goob kale oo barakaysan.	____	____
Khalkhalgelin, beddeli kara ama burburin kara goob muhiim u ah kaydinta dhaqanka iyo qiyamka.	____	____

Go'aaminta Qiimeeynta Raad-reebka Deegaanka

Waxqabadka la qoondeeyay waxa uu keeni karaa raadreebyadan togan ee soo socda (tax)
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

Halkan waxa aan ku soo jeedinyaa in..... (Waaxda u xilsaaran) ay dib u eegtay oo faaqidday mashruuca kor ku faahfaahsan manta oo ay taariikhtu tahay _____; sidaas awgeedna ka gaadhay go'aannadan soo soo socda, iyada oo ka duuleysa mashruuca (waad tirtiri kartaa meel kara oo aan ku habboonayn):

1. Waxa la ogaaday in mashruucu aanu lahayn wax raadreeb ah oo halis ku ah deegaan, sidaas awgeed mashruucani uma baahna in la sameeyo deraasadda QRDB.
2. Waxa la ogaaday in mashruucani uu leeyahay raadreeb laxaad leh oo ku iman kara deegaanka, balse waxa lagu soo lifaaqay habraacyadi lagu yaraynay Raad-reebka taban ee mashruuca, sidaas awgeed waxa ay sabab u noqon karaan in la ansixiyo oo la fuliyo mashruucan (Ku lifaaq faahfaahinta loo baahan yahay)
3. Waxa la ogaaday in amshruucani uu raadreeb laxaad leh ku yeelanayo deegaanka, sidoo kale aan loo hayn habraacyo ku filan oo lagu yaraynayo Raad-reebka deegaanka, sidaas awgeed waxa looga baahan yahay deraasad faahfaahsan oo lagu caddaynayo QRDB.

Lafagur iyo Gorfayn (Qoraal ahaan u raaci wixii lagama maarmaan ah)
.....
.....
.....
.....
.....

Magaca Laanta Dib-u-eegista Mashruuca
Samaysay_____
Magaca Masuulka:
Xilka: _____
Saxeexa Masuulka Laanta: _____
Taleefanka._____Ciwaanka_____
Xilliga uu soo gaadhay WDIC: _____
Saxeexa Masuulka: _____
Xilka: _____

Lifaaq D: Mashaariicda Guud iyo Waxqabadyada Maraya QRDB

1. Guud ahaan–
   a. Waxqabad kasta oo gaadhaya deegaanka ku xeeran;
   b. Dhisame kasta oo gaadhaya deegaanka ku xeeran;
   c. Isbeddellada guud ee ku yimaadda ka faa'iideysiga dhulka.
2. Horumarinat Magaalooyinka: -
   a. Aasida suuqyada cusub;
   b. Aasaasidda dhul wershadeed;
   c. Aasaasidda iyo ballaadhinta goobaha madaddaalada;
   d. Aasaasidda ama ballaadhinta, magaalaynta dhulka buuraha ah, beeraha ashahada iyo goobaha ciyaaraha kale.
   e. Suuqyada tukaamaysiga ee isku-dhafan
3. Gaadiidka iyo isu-socodka, sida:
   a. Waddooyinka waaweyn;
   b. Waaddooyinka farshaxanaysan,
   c. Madaaradda iyo gegada dayuuraduhu ka haadaan;
   d. Dhuumaha gaasta iyo saliidda;
   e. Water transport.
4. Balliyada, biyaxidheennada, marin biyoodyada, iyo il-biyoodyada, sida:
   a. Kaydadka, balliyada, iyo berkadaha
   b. Biyamareennada iyo biya-qabatinta dooxyada
   c. Meelaha daadka ama fatahaadda lagu xakamaynayo;
   d. Qodiska dhulka hoose oo ay ku jiraan ka faa'iideysiga tamarta dhulka hoose laga soo saaro.
5. Hawada in wax lagu dhex buufiyo.
6. Macdanaysiga, sida macdanta dhulka laga soo qodo
   a. Biraha muhiimka ah;
   b. Dhaqaxaanka macdanta ah;
   c. Biraha;
   d. Dhuxuldhaqaxda;
   e. Foosfeytka;
   f. Dhaqaxnuuradeedka;
   g. Dhaqaxaanta kale;
   h. Ciidda iyo jayga;
   i. Dhoobada;
   j. Soo saaridda shidaallada;
   k. Soo saaridda dhaqaxaanta dahabka iyo ka faa'iideysiga Meerkurida.
7. Kaymaha iyo arrimaha la xidhiidha, sida–

a. Ka faa'iideysiga dhrta;
b. Xaalufinta kaymaha;
c. Dib-u-dhireynta kaymaha iyo qurxintooda.

8. Beeraha, sida–
   a. Beeraha baaxadda leh ee beeran
   b. Isticmaalka suntan cayayaanka;
   c. Beerista midho aan waddanka hore looga isticmaali jirin;
   d. Adeegsiga carro-nafaqeeyayaasha;
   e. Waraabka.
9. Warshadaynta iyo warshada waxsoosaarka, sida:–
   a. Wershadaynta macdanaha, isticmaalka dhaqaaxanta macdanta ah iyo macdanaha kale;
   b. Dhalaalinta iyo sifeynta dhagaxaanta macdanta iyo macdaha kale
   c. Dhalaalinta biraha
   d. Soo saaridda jaajuurka iyo labanka;
   e. Sibidhka iyo wershadaynta dhaqaxaanta;
   f. Samaynta muraayadaha iyo quraaradaha
   g. Fertilizer manufacture or processing;
   h. Beerista dhirta suntan ah;
   i. Sifeynta shidaalka iyo saliidaha;
   j. Farsamaynta saamaynta iyo hargaha;
   k. Gawraha xoolaha iyo wershadaynta hibilka;
   l. Wershadaynta kiimikooyinka;
   m. Goobaha raashinka iyo midhaha lagu mooriyo;
   n. Wershadaynta kalluunka;
   o. Warshadaha looxa iyo waraaqaha lagu kala bixiyo;
   p. Wershadaha cuntada lagu farsameeyo;
   q. Wershahada soo saara baarbuta, iwm;
10. Xidhista ama waageerista meelaha dabiicga ah:
   a. Samaynta ciyaarta;
   b. Xidhista seerayaasha;
   c. Samaynata ama waxkabeddelka siyaasdaha maaraynta kaymaha;
   d. Samaynta iyo waxkabeddelka siyaasdaha biya-xidheennada;
   e. Siyaasadaha maaraynta habnololeedka deegaanka, gaar ahaan isticmaalka dabka;

f. Ka ganacsiga dhirta ama xayawaanka dabiiciga ah
g. Introduction of alien species off fauna and flora into ecosystems
h. Soo waaridista nooc cusub oo xayawaan ama dhir ah.

11. Samaynta iyo soo saaridda ama adeegsiga laababka carsiga ah ee lagu tijaabiyo ama wax-lagaga beddelo noolayaasha.

Lifaaq E: Mashruuca Ka Maarmaya Hannaanka Qiimenyta Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada

Diiwaankan soo socda waxa ku xusan mashaariicda ama waxqabadyada aan looga baahnayn in la mariyo hannaanka QRDB. Waa in nooca mashruuca iyo saamayntiisa si taxaddar leh loo eego si loo ogaado in uu u baahan yahay deraasadda QRDB iyo in kale.

- Waxqabadyada haramaynta beerta, dayactirka ama dhismayaasha laga fulinayo beeraha yaryar.
- Dhisidda ama dayactirka guryaha qoysaska
- Xog ururinta (cilmi ama waxbarasho) marka laga reebo haddii cilmibaashita loo adeegsano kiimikooyin ama noolyaha khatarta ugu jira in ay sii dabar go'aan.
- Kala-wareejinta mukiyadaha dhulka iyo adeegyada kale, haddii aanu isbeddel ku imanaynin goobta
- Waxqabadyada maaraynta deegaanka
- Dayactirka degdegga ah ee lagu samaynayo adeegyada aasaasiga ah ee aan ka duwanayn deegaanka ku xeeran

Lifaaqa F: Diiwaanka Maaraynta Dhacdada

Jamhuuriyadda Somaliland
Waaxda Ilaalinta Deegaanka

Diiwaanka Maaraynta Dhacdada Ee Somaliland						
Tixraac/Sumad	**Wakhtiga ay ku soo gaadhay**	**Magaca iyo taleefanka qofka cabanaya**	**Arrinta uu ka cabanayo/ Faahfaahinta dhacdada**	**Goobta**	**Nooca**	**Tallaabada la qaaday**

Lifaaq G: Qorshaha Maaraynta Deegaanka iyo Bulshada (QMDB)

Qorshaha Maaraynta Deegaanka iyo Bulshada (QMDB)					
Raad-reebka Deegaanka iyo Bulshada	**Faahfaahinta Raad-reebka**	**Habraacyada Yaraynta Raad-reebka**	**Qiimaha**	**Masuuliyadda Fulinta**	**Wakhtiga Loo Asteeyay**
Wejiga Dhismaha:					
Wejiga Hawlgalka					
Wjiga Gebagebada					